# .#socdaal kii Ibnu batuuta ee Muqdisho.

## 1330.M.

[Tarjume: Xassan Xayle]2014/2013.

**Maqdasho** (Sidaas ayaa magaca magaalada loogu dhawaaqi jiray).

Waa magaalo aad u balaaran oo dadkeedu leeyihiin ama dhaqdaan geel badan. Waxay maalin walba gawracaan boqol neef oo geel ah. Waxaa kale oo ay leeyihiin ari aad u badan; waa dad ganacsato ah oo, jir ahaan, xoog badan. Waxaa Maqdasho lagu sameeyaa dhar, farsamo ahaan, magaceeda lala xiriiriyo oo ay magaaladu caan ku tahay; dharkaas, oo wax la mid ah uusan jirin, ayaa loo suuq geeyaa Masar iyo wadamo kale

Waxaa caadada dadka degan magaalada Maqdasho ka

mid ah, in haddii uu markab kusoo xirto marsada ay doomo yaryar usoo diraan halka markabku joogo. Waxaa doomaha saaran dhalinyaro mid waliba uu gacmaha ku sido saxan, ama xeero daboolan oo ay cunto ku jirto; wiil kasta oo dhalinyarada ka tirsan waxuu cuntada siinayaa nin ka mid ah ragga markabka la socda, oo ah ganacsato u timid Maqdasho hawlo beecmushtar, islamarkaana waxuu ogeysiinayaa in ninka uu siiyay cuntada reerkooda marti u yahay.

Waxaa jira rag ganacsato ah oo markabka la socda, magaaladana dhawr jeer oo hore yimid; raggaas kuma raagaan markabka dushiisa; waxay ku degaan halkii ay doonaan madaama magaalada ay ku leeyihiin dad macaamil ganacsi iyo aqoon kala dhexeyso

Marka leys dhaafsanayo badeecada ama iibku uu dhacyo, waa in ganacsatada labada dhinac ay joogaan goobta. Sidoo kale, ganacsatada reer Maqdasho ma aqbalaan in badeecadood qiimo raqiis ah lagu qaato!.

Dhalinyarada markii ay soo fuuleyn dusha markabka, ayaa nin ila socday oo musaafirka ka mid ah u sheegay inaan, anigu, aheyn ganacsade, hayeeshee ahay ninfaqiih ah ama caalim. Dhalinyarada kii ugu soo horeeyay ayaa ku dhawaaqay: “Ninkaan waxuu marti u yahay Qaadiga magaalada.” Markaas ayaa nin qaadiga la xiriira arrinteyda si gaar ah loogu sheegay; kaasoo ka dib ii kexeeyay dhinaca xeebta isagoo ay dhinaca ka socodaan koox arday ah.

Ka dib markii aan soo degay, oo aan salaantana kala qaadnay

Qaadiga iyo daka la jooga ayuu Qaadigu igu yiri, “Bismilaahi, waxaan soo salaamaynaa Sheykha” -Waxaan ku yiri: “Sheykhu yuu yahay?” -Waxuu iigu jawaabay, “Waa Suldaanka” Xaakimka ama suldaanka, ayaa, sida wadamo badan oo kale, ay reer Maqdasho iyaguna ugu yeeraan naynaasta ah ‘Sheykh’ Qaadiga waxaan weydiistay, ka hor inta aanan booqan Suldaanka in marka hore aan dego. Waxuu iigu jawaabay: “Waxaa dhaqan ah, in haddii uu yimaado nin faqiih ah ama shariif ah iyo qof saalax ah, (Diin wanaagsan), inuusan magaalada ku degin ilaa uu la kulmo Suldaanka” -Sidaas ayaan Qaadiga iyo raggii la joogay ugu raacay guriga Suldaanka Suldaanka oo magaciisu yahay Abukar Sheykh Cumar, (Abu-bakar ibnu Sheykh Cumar), assal ahaana, kasoo jeeda Barbar, (Waaa magac loo aqoon jiray Soomaalida), ayaa afka Maqdashiga, (Afka Soomaaliga) ka sokow, waxuu yaqaan amd ku hadla Afka Carbiga. Waxaa caado u ah ama uu yeelaa haddii

uu markab soo xirto, inuu markabka usoo diro qof soo hubiyo dalka markabku ka yimid, cidda iska leh, naaquudaha, (Kabtanka) wada, inta uu markabku la egyahay ama qaadkiisu yahay, badeecadda saaran iyo gancsatada la socota; markaas ka dib, ayuu Suldaanku go'aamiyaa ogolaashaha marti-galinta ama diidmo ah in dadka lasocdo eeysan kasoo degin markabka! Aniga iyo Qaadiga, oo magaca loogu yeero yahay Ibnu Al-Burhaan, assal ahaana u dhashay Massar, ayaa markii aan gaarnay guriga Suldaanka waxaa noo soo baxay, oo na qaabilay wiilal dhalinyaro ah oo salaamay Qaadiga; islamarkiibana Qaadigu faray dhalinyarada inay, Amiirka ku war galiyaan in ninkan ila socda (Ibnu Batuuta) ka yimid dhanka Xijjaas. Waqti yar ka dib, ayuu nagu soo noqday wiil ka mid ah dhalinyaradii fariinta qaaday. Waxaa loo soo dhiibay saxan ay ka buuxdo caleynta la cuno ee, Awraaqu tanbuul iyo filfil. Waxuu isiiyay toban caaleemood, waxaa kale uu isiiyay xoogaa

filfil ah. Qaadiga iyo ardayda xerta ah, iyagana, waxuu siiyay intii saxanka ku hartay. Waxaa kale aw inoo keenay weel uu ku jiro sharbeed ama cabitaanka loo yaqaano Biyo-wardiga, (Maa-ul wardi Al-Dimishiqi), biyahaas ayuu wiilkii aniga iyo Qaadiga noo shubay.

Markii aan wax cunay ayaa Qaadiga loo sheegay in Suldaanku soo amray in ninka soctada ah la dajiyo guriga (Daarul dalabah); oo ah guri aad ugu dhaw daarta Suldaanku deganyahay, waxaana loo diyaariyay ama loogu talo galay ardayda magaalada aan hoyga ku laheyn. Runtii, waa guri si wanaagsan loo firaashay oo wax kasta oo martidu u baahato laga helo!

---

sharaxaad kooban ereyada qaar .

- Maqdasho, ama Maq-da-sho: magaca magaalada Muqdishow sidaas ayaa loogu dhawaaqi jiray.

-Faqiih: waa qof faham iyo ogaal qoto dheer u leh Qur'aanka Kariimka iyo Sunada Nabiga (CSW).

-Amiinka: waxuu noqon karaa xog-hayahay ama ilaaliyaha Sheykha

- Awraaqu tanbuul: waa caleen loo cuno inay hamuunta ama hungiriga qofka furto. Cunta guud ka hor ayaa la cunaa. Caleentaas, (Betel leaves), waxaa laga cunaa wadamada Aasiya iyo meelo kale

_____-

Maamuus iyo Marti-galin

Markii aan galnay Guriga Martida ayaa wiilkii dhalintayaraa waxuu guriga Sheykha nooga keenay cunto. Waxaa wiilka la socday nin ka mid ah wassiirada Sheykha oo ah wassiirka u qaabilsan marti-soorka, oo isagoo isoo dhaweynaya, igu yiri, "Waxaa ku salaamaya, (Mawlaanaa Sheykh) waxuuna ku leeyahay: imaanshahaagu waa kheyr!"

Soo dhaweenta ka dib, waxaan bilownay in cuntadii naloo keenay aan cuno. Cuntadu waxay aheyd bariis lagu kariyay dufan, (Subag), laguna soo rogay saxan weyn oo qoray ka sameysan, (Xeero). Waxaa dusha lagasoo saaray cadad 'Koshaan' ah oo goosaar ama iidaan looga dhigay hilib digaag, mid xoolo iyo malaay(kaluuun); sidoo kale, waxaa cuntada lagu daray, Baquul iyo Moos oo isagoo aan weli bislaan, laguna kariyay caano dhaay ah, ayaa lasoo saaray labo weel oo

midkood uu ku jiro mooskii karsanaa, midka kalena ay ku jiraan caanihii lagu kariyay.

Cuntada waxaa korka looga daray liin iyo xirmo filfil ah oo biyo lagasoo saaray, taasoo loo isticmaalayo khal ahaan. Waxaa kale oo lagu daray sinjibiil cagaar iyo canbe, oo ah miro la mid ah ama u eg tufaaxa hayeeshee gudaha laf ku leh, kaasoo haddii uu bissil yahay aad u macaan badan, lakiin marka uu ceyriinka yahay sida liinta u dhanaan; sidaa darteed markii ay cunaan hal luqmad oo bariid ah ayay raaciyaan wax yaabahaas dhanaanka ah oo ay sida khalka ay u isticmaalaan

Dadka reer Maqdasho, hal nin oo ka mid ah waxuu cunaa inta ay koox inaga ah ay cuni karto, sidaas awgeed waa dad cayilan oo jirkood buuran yahay. Markii aan wax cunay ka dib, ayuu Qaadigu naga tagay; waxaan Guriga Martida ku nagaaday ama aan joogay seddax maalmood oo malin kastaba, sida ay caadadoodu tahay, seddax jeer aniga iyo dadkii musaafirka ahaa

ee markabka aan ku wada nimid, cunto naloo keenayay Maalinta afaraad oo aheyd maalin Jimaca ah, ayaa waxaa ii yimid Qaadiga iyo ardaydiisa. Waxaa kale oo la socday wassiir ka mid ah wassiirada Sheykha; waxaa la ii keenay dhar ka kooban maryo go` ah oo ragu dhexda ku xirto, taasoo surwaal u dhiganta madaama dadka reer Maqdasho aysan, dhar ahaan, aqoon surwaal. Waxaa kale oo la ii keenay khamiis kor laga gashto oo tolmadiisu Missri tahay. Waxaa kale oo ku jiray dhar fidqado ah oo khamiiska laga hoos qaato, dhinaca horeyna ka furan, sameyskiisa ka yimid Al-Qudus; waxaa kale oo la isiiyay cimaamad Massar laga keenay. Dadkii masaafurka ahaa, ee aan wada soconay, waxaa iyagana la siiyay dhar ceenkaas ah oo sidaas u sameysan.

Intaa ka dib, waxaan aadnay Masjid-jaamaca oo aan salaadda ku dukanay meel ka danbeyda, Al-maqsuura . Markii uu Sheykhu

kasoo galay albaabka maqsuurada aniga iyo Qaadiga ayaa salaanay Sheykha, si wanaagsan ayuu isoo dhaweeyay; marka hore afkooda ayuu kula hadlay Qaadiga, ka dib Af-Carabi ayuu igu yiri, “Imaasho wanaagsan ayaad noogu timid, waxaadna sharaftay dhulkeena, wehel ayaad noo tahay”

Soo dhaweenta ka dib, waxuu Sheykhu u baxay meel banaan oo ka mid ah xeendaabka masaajidka, halkaas aw ku aasanyahay aabihiis; waxuu is-dultaagay qabriga isagoo duco ku aqriyay, Ilaaheyna u baryay

**Maqaamka Suldaanka**

Markii uu ka soo tagay qabriga aabihiis, ayaa waxaa iyagoo wada socoda Suldaanka u yimid dhammaan wassiirada, dad madax ah iyo taliyayaasha ciidamada oo dhammaantood, halkaas ku, salaamay Suldaanka. Dhaqanka ay isku salaamay dadka Maqdasho, waxuu la mid yahay kan reer Yemen oo kale; waxuu qofku wax salaamaya uu marka hore farta suulka xigta

uu galinayaa ciidda, ka dibna waxuu geynayaa madaxiisa isagoo dhahaya ama oranaya: cissigaaga Ilaahay ha dheereeyo ama ha raajiyo. Islamrkiiba, Sheykhu kobahiisa ayuu iladay, waxuuna ka baxay albaabka masaajidka isagoo amray Qadiga iyo aniga inaan ilano ama gashano kobaheyn, ka dibna isaga u raacno dhanka gurigiisa oo aan ka fogyen masaajidka. Dadka intooda kale ayaa nasoo raacay iyagoo cagacad ama aan kobo sidan Sheykha waxaa madaxiisa lagu hareeyay ama la dul hagoogay afar qubaab oo xariir midabo leh ka sameysan, iyadoo qubadiiba uu ku sawiranyahay shimbir midkiisu dahabi yahay. Maalintaas oo jimaco aheyd, dharka Sheykhu waxuu ku labisnaa khamiis horey ka furan oo Qudsi ah, midabkiisuna cagaar yahay; dharka khamiiska laga hoos qaato oo ka kooban fidaqyo is-raacsan iyo qaar garbaha la saaro oo aad u quruxsan, isku jirkoodana laga keenay dalka Masar. Waxuu dusha ka labisnaa go' xariir ah iyo cimaamad weyn.

Maalintaas waxaa Sheykha loo garaacay durbaano, waxaana loo yeeriyay boon noocyo kala duwan ah; waxaa horey iyo gadaal ka socday madax iyo ciidan, hareerahana waxaa ka socday Qaadiga, culumo fuqaho ah iyo dad sharaf iyo xurmo leh, waxayna dhammaantood u socdaan goobta wadatashiga

---

sharaxaad kooban ereyada qaar .

-Mawlaanaa Sheykha: erayga' mawlaanaa' macno dhawr ah oo isku dhaw ayaa loo adeygsadaa, kaasoo, guud ahaan, tilmaamaya qadarin iyo weyneyn ama gargaar iyo garab joogsi. Waxuu noqdaa cinwaan, (Title) la siiyo boqorada, madaxda iyo culimada diinta Islaamka. Waxaa, xushmad ahaan, la siiyay cinwaankaas ama loogu jiray dadkii adoonta ahaa ee Diinta Islaamka qaatay

- Koshaan: waxuu la mid yahay ama uu yahay KOSHAAR. Waa xawaaji lagu maceeyo hilbka ama dalaca maraqa, kaasoo xiriir la leh, (Curry) assal ahaan laga isticmaali jiray India iyo wadamada kofur-bari Aasiya

- Baquul: waa khudaar kala duwan oo lagu dhinac cuno cunta guud, (Main meals), gaar ahaan qadada

- Al-maqsuurah: qayb yar oo ku dhinac taal ama gooni ka ah qol weyn

- Qubaab: waa cimaamad iyadoo dhawr wareeg leysgu aadiyay madaxa dushiisay lagu xiray

---

## Kulanka Mashuurada Kowaad & labaad

Qaabkaas iyagoo u wada socday ayay galeyn, Mashuurada ka dibna, iyagoo kala danbeeya ayaa waxaa marka ugu hore fariistay wassiirada, waxaa ku xigsaday madaxda iyo taliyayaasha ciidanka. Qaadiga waxaa loo fidiyay ama loo dhigay gogol u gaar ah oo uusan qof kale kula fariisan; waxaana fadhiga joogay fuqahada iyo dad sharaf iyo xurmo leh. Sidaas ayuu xaalku ahaa ilaa waqtiga Salaadda Casir la gaaray; goortaas oo dhammaan dadkii goobta joogay ay Sheykha oo imam u ah la tukadeen slaadda Cassirka.

Salaadda markii la tugaday ka dib, ayaa askartu u joogsatay safsaf, iyagoo u kala horeeyay sida ay u kala darjo sareeyaan. Markaas ayaa waxaa la tumay durbaano, waxaa la yeeriyay boon iyo Al-Siyrinayaat .

Inta qalabkaas la garaacayo qof walba meesha uu taaganyahay iskama dhaqaajinyo, mana sameynayo wax nuuxnuuxsi ah; dadka kale qofkii socda islamarkiiba halkiisa ayuu istaagayaa, isagoo horey ama gadaal aan dhinacna u baxeyn. Markii garaaca buunka iyo durbaanka la joojiyo ayaa dadku is-wada salaamayaan iyagoo yeelaya qaabkii aan horey usoo sheegay, (Sida ay reer Yemen isku salaamaan), ka dibna kala tagaya isagoo qof walba danahiisa u dhaqaaqaya ama halkii aw u socday aadaya

Maalin kasta oo Jimco ah, dadka Maqdasho, cadadoodu sidaas ayay tahay. Maalinta xigta ee Sabtiga ah, dad kala duwan ayaa kusoo urura albaabka guriga Sheykha. Waxay fariistaan waabab ama daashash ku yaal meel ka baxsan daarta Sheykha. Qaadiga ayaa noqda qofka ugu hor gala halka uu Sheykhu fariisto, iyadoo ay culimadu ku xigsadaan; markaa ka dib ayaa waxaa galo ikhyaarta iyo dadka sharafta leh. Sidoo kale waxaa fadhiga

soo xaadiro duqeyda iyo xujeyda.

---

Fadhiga kale, (Maalinta xigta) oo ah Mashuurada Labaad ayaa wada tashi loo fariistay. Dadka goobta yimid waxay ku fariisteen kuraas ka sameysan qoray (Alwaax), oo fadhiga loogu talo galay. Qaadigu waxuu fariistaa kursi u gaar ah. Sidaas oo kale ayay qolo kasta oo ka mid ah dadka mashuurada yimid ay meel u gaar ah, oo aan cid kale la wadaageyn ama dhex galeyn, u fariisteen

Intaa ka dib, waxaa fadhiga soo galay Sheykha oo markiiba fariistay meel isaga u gaar ah. Waxuu u yeeray Qadiga oo dhinaciisa bidix fariistay. Markaa ka dib ayaa waxaa soo joogsaday culimada fuqahada ah oo ninka ugu da'da weyn hor fariistay Sheykha, intooda kalane inta salaameyn Sheykha ka baxay fadhiga

Markaa ka dib, waxaa soo kacay ikhyaarta iyo dadka sharafta

leh oo ninka ugu da’da weyn uu hor fariistay Sheykha, intooda kalena markii ay salaan gacan qaadeyn ka baxeen goobta fadhiga

Sidaas oo kale ayaa duqeyda iyo dadka xujeyda ah ay yeeleyn; iyadoo qofkooda ugu dhalinta weyn uu hor fariistay Sheykha, intooda kalena markii ay salaameen, iyaguna, ka baxeen fadhiga

Intaa ka dib, waxaa fadhiga soo galay, iyagoo isku xiga, wassiirada, madaxda, taliyayaasha askarta. Waxay salaameyn Sheykha ka dibna way baxeyn.

Waxaa dadka fadhiga ku haray loo keenay cunto. Qaadiga iyo ikhyaarta kale waxay wax la cuneyeen Sheykha. Waxaa kale oo fadhiga ka cunteeyay cid kasta oo goobta joogta ama fadhiga ku hartay

Haddii Sheykhu doono inuu, si gaar ah u, sharfo qof ka tirsan madaxda dowladda, waxaa qofkaas loogu yeeraa halka uu Sheykhu fadhiyo si uu ula cunteeyo

Guud ahaan, dadka kale ee goobta yimid waxay ka cunteyeen Daaru Al-dacaam iyagoo u galay daarta sidii ay ugu kala horeyn markii ay galayeen fadhiga mashuurada

Xaalku markuu sidaas ku dhammaaday, ayaa Sheykhu u kacay dhinaca daartiisa. Qaadiga, wassiirada, kaatibu Al-sir iyo afar nin oo ka tirasan madaxda sare ee dowladda ayaa u fariistay xukun ay ku kala saarayaan dad arrimo isku heysta

Waxyaabaha dadku isku heystaan ee ku saabsan Shareecada, Qaadiga ayaa xukunkooda marinaya. Waxii intaas kasoo hara oo arrimo kale ah, waxaa ka talo bixinaya dadka Ahlu shuurada ah oo ka kooban wassiirada iyo madaxda dowladda

Arrimaha waxii looga maarmiwaayo talada Suldaanka, qoraal ahaan ayaa loogu diraa, isagoo, islamarkiiba, jawaaba ku saabsan arrinta dusha uga soo qoray bidaaqad Sidaas ayay aheyd cadadoodu mar kasta

Ibnu Battuuta, ka dib, markii aw u dhamaaday socdaalkiisa

# Muqdishow, waxuu u anba- baxay, isagoo raacay markabkii uu ku yimid, dhinaca Bilaadu Al-Sawaaxil waxuuna booqasho ku tagay magaalooyinka Mumbaasa iyo Kilwa oo ku yaal xeebaha Bariga Afrika.

Tarjume: Xassan Xayle [hassanhaile@hotmail.com].2014

caasimada.com

Somalitalk.com

Jowhar.com.

---

-Mashuurada: eraygan waxuu tusinayaa ama xiriir u yahay dhawr macno oo assalkoodu mid yahay sida talo, wada-tashi ama goob lagu tashanayo (Counselling, Consultation); sidoo kale waxii talo ka soo baxa ama uu tilmaamo qof ah khabiir, dhaqtar, la taliye ama guddi arrin loo xil-saaray, -Fadhiga Golaha Ummadda, shirarka iyo kulamada guud, (Congress), dhammaantood waxay soo galayaan macnaha uu bixinayo erayga Al-mashuurah

[- Al-siyrinayaat: waa aalad ama qalab, (Device) markii la afuufo dhawaq bixiya. Waxuu noqon karaa nooc hore oo buuqa,(buunka) (Trumpet) ka mid ah

[-Mashuurada labaad: waa kulan labaad ee loo fariistay shoowr iyo wada-tashi

[-Daaru Al-dacaam: waa dhismo gudihiisa lagu cunteeyo sida maqayadaha casrigan oo kale

[- Kaatibu Al-sir: waa qofka xogta diwaan galiya ama qora waxii fadhiga looga hadlo

[-Bidaaqad: waa waraaqad yar oo macluumaad, (Informations) gaar ah lagu qoray

[-Bilaadu Al-sawaaxil: waa wadamada ku yaal xeebaha Bariga Afrika, (Casrigan waa Keynay iyo Tanzaniya); Mumbaasa waa magaalo xeebeed iyo xarunta dhaqanka Islaamka ee Kenya. Kilwa ama Kilwa-kiswani waxay aheyd xarun aad u weyn oo ay dageyn Muslimiin

---

hadii aan warcelin kabixiyo qaabka oow utarjumay Xasan xalane waxaan dhihi lahaa waa qof qibrad dheer u leh qaabka tarjumaada.waloow aanan aqoon u leheeyn shaqsi ahaan.

**qaabka tarjumaada iskuul miyaa laga bartaa?**

waloow aanan arinkaas isku mashquulin hadana waxaan wada ognahay in sigaar ah loo soo barto macalin nimada iyo qaabka ardayga wax loo faham siiyo.

dadka wax turjumo ee Bulshada inta aan arkayay waxaa ugu wanaagsanaa










1-Maxamad cabdi Daa-uud

2-Xassan Xayle

3-Boodhari Warsame

4- Xasan yacquub(fasiray Quranka)

qaar kale oobadan in eey jiraana waa macquul lkn indhaheeyga inta eey qoraaladooda aqriyeen iyaga ayaa ugu sareeyay. qaabka tarjumaada , naska in eey isdultaagaan waa rag ku dadaalay,siiba wadaadka Salafiga ah ee Fasiray Quraanka , cid lala meeldhigo majiro Kutubkiisa. .

# >>>dhamaad<<<<<

Qarda jeex iyo qarabaxsi hanaga ahaato waxaan isku deyeeynaa in aan wax uun ka niraaho Kutubka Imaamka noo qoray. aamusnaanta in wax la, abla-ableeyo ayaa ka qeerbadan

# Qaabkee , u-fahamnaa , qisadii Ibnu batuuta?(Muqdisho



qoraalkeeygan waa mid ku wajahan qaabka aan u fahmi leheeyn qisada.

moowduuc walba oow Kutubka ku qoran in aan kala dhigdhigno ayaan isku dayeeynaa, qaabka aan ula tacaamulno Xadiiska Nabiga ayaan isku deyeeynaa in aan fiqhi ahaan u fasirno qisada oow Muqdisho kaqoray Ibnu Batuta .

A,B,T,J .sidaas ayaan uqodobeeynay

---

# A)



ثم سافرنا منها في البحر خمس عشرة ليلة، ووصلنا مَقْدَشَوْ . وضبط اسمها بفتح الميم واسكان القاف وفتح الدال المهمل والشين المعجم واسكان الواو. وهي مدينة متناهية في الكبر، وأهلها لهم جِمال كثيرة ‖ ينحرون منها المئين في كل يوم، ولهم أغنام كثيرة وأهلها تُجار أقوياء وبها تصنع الثياب المنسوبة إليها التي لا نظير لها، ومنها تحمل إلى ديار مصر وغيرها

Geel tiro ahaan 200 gaarayo ayaa maalin walba lagu qalaa Muqdisho. taas waxeey daliil u tahay in shacabka kunool

magaalada eey kor udhaafayeen 2 milyan oo ruux.

xiligan aanjoogno magaalada 200 oo neef kabadan laguma qalo shacabka kunool waxaa lagu qiyaasaa 3 milyan iyo kabadan.[2012---2016.M]

---

# B)

وأهلها تُجار أقوياء وبها تصنع الثياب المنسوبة إليها التي لا نظير لها، ومنها تحمل إلى ديار مصر وغيرها

Bulshada degan Muqdisho waa dad xoogbadan(xalaal quudato xoogooda ku nool)waa dad ubadan ganacsato. dhar ayeey soo saaraan Masar ayaa loo iibgeeyaa iyo wadamo kale waana dad ku caanbaxay soosaarka dharka waana dhar aad loo jecelyahay.(ereyada qurxoon ee kamuuqdo ilbaxnimada iyo ganacsiga Umadeena caanka ku eheeyd waqooyi iyo koonfur ,maqlida ereyadaas qurxoon waxeey naxdin ku tahay caruurtii eey soo abaabiyeen gumeestayaasha ee had &goor isku deyo in eey sawir xun kabixiyaan xadaarada umadeena. kuwaas waa caruur aan qaan gaarin, dariiq walba ayeey lataagan yihiin Somalida waa reer

guuraa! waxaan isweeydiiyay Zeylac weligeed malaga guuray oo malaga hayaamay? Beydhabo Beeraha ku hareereeysan goorma ayaa laga guuray ? Baraawe sidoo kale , doqonta waxeey mudan yihiin in masaasad loo soo iibiyo)

---

T)

**ذكر سلطان مَقْدَشَوْ**

وسلطان مَقْدَشَوْ، كما ذكرناه، إنما يقولون له الشيخ واسمُه أبو بكر بن الشيخ (50) عمر، وهو في الأصل من البَرْبَرة وكلامه بالمقْدَشيّ، ويعرف اللسان العربيّ، ومن عوائده أنه متى وصل مركب يصعد إليه صنبوق السلطان، فيسأل عن المركب من أين قدم، ومَن صاحبه، ومَن رُبّانه، وهو الرايس، وما وسقه، ومَن قدم فيه من التجار وغيرهم، فيعرف بذلك كلّه ويعرض على السلطان، فمن استحقّ أن ينزله عنده أنزله.

hadalkaas sare kamuuqdo waxuu daliil u yahay talada magaalada cida eey ka go`day in eey eheeyd Somali.

dadka kudoodayo in magaalda eey xakumi jireen Carab waxaa looga baahan yahay daliil in eey meesha keenaan.

Masaari, Yaman, Cumaan , dhamaan shucuubta aan walaalada nahay taariiq xanuun badan ayeey soo mareen Shiico ayaa kusoo duushay 250 sano ayaa dalkooda shiico gumeeysaneeysay .nin

dalkiisa gumeeste dul degan yahay maxuu dalkale galaangal kuyeeshaa?.

isha mari taariiqda Dowladii REER FAADUMO.

---

J)

وعلى القاضي، وقال : إن مولانا أمر أن ينزل بدار الطلبة وهي دار معدّة لضيافة الطلبة، فأخذ القاضي بيدي، وجئنا إلى تلك الدار وهي بمقربة من دار الشيخ مفروشةٍ مرتّبة بما تحتاج إليه ثمَّ أتى بالطعام من دار الشيخ ومعه أحد وزرائه وهو الموكّل بالضيوف، فقال : مولانا يسلّم عليكم ويقول لكم : قدمتم خير مقدم، ثم وضع الطعام، فأكلنا وطعامُهم الأرز

Markii aan wax cunay ayaa Qaadiga loo sheegay in Suldaanku soo amray in ninka soctada ah la dajiyo guriga (Daarul dalabah); oo ah guri aad ugu dhaw daarta Suldaanku deganyahay, waxaana loo diyaariyay ama loogu talo galay ardayda magaalada aan hoyga ku laheyn. Runtii, waa guri si wanaagsan loo firaashay oo wax kasta oo martidu u baahato laga helo!

--

Wadaadka waxoow nooga qisooday inlagu soo dhaweeyay Guryo loodhisay ardayda magaalada cilmiga usoo doonatay.

dabcan aqoon kale meesha ma oolin waxeey baran jireen Kitaabka Minhaajka ee Imaam Nawawi.

cilmi falag caruurta lama bareeynin Iskuulo aqoon walba dhex taalana meesha kama furneeyn ,Far Somali laqoro waagaas majirin hadii eey jirtayna waxaa lagu qori jiray qaabka Carabta wax u qorto.

**maxeeytahay duruufta ardayga ku kaliftay in oow doowlada hoostago** ?

jawaabta waa iska fududahay xiligaas Kutub in oow helaa qofka aad ayeey u adkeeyd, tusaale aan kusiiyo kutubka oow qoray Jaaxith(d) ee lagu magacaabo ALBAYAAN WATABYIIN hadii ladhexkeeno magaalada cid iibsan karto majirin waayo waa qaali, sidaa daraadeed maktabada eey maamusho dowlada ayaa daabici jirtay qarash badana kubixin jirtay. ardayga hadii

oow ubaahdo casharka masjidka laga aqriyo ayuu dhageeysanayaa ,lkn kutub suuqa laga soo iibsado aadna guriga dhigatid sida lagu helo masahlaneeyn.

ibnu khalduun marka oow qoray Kutubka (muqadimada) waxoow ugeeyay madaxweeynaha dalka sidaas ayaana loogu keeydiyay maktabada qaranka ee xiligaas jirtay.

**Waziirka martida soo dhaweeyo**

Somalida maanta joogto, xiliga abaaraha dhacaan TEENDHO dadka lagu hooyo ma heli karaan halka awoowa yaashii Somalida ku abtirsan jirtay 700 sano kahor eey lahaayeen guryo eey kusoo hirtaan ardada dalkooda wax ubaraneeyso.

700 sano kahor ayaa waziir ka hoowlgelijiray Somaliya intaas ayaaba ah laabqaboojis loo soo daliishan karo in Somalida cizi iyo sharaf leheeyd.

---

X)


والواحد من أهل مَقْدَشُو يأكل قدر ما تاكله الجماعة منّا، عادةٌ لهم ‖ وهم في نهايةٍ من
ضخامة الجسوم وسِمنها، ثم لمّا طعمنا انصرف عنّا القاضي، وأقمنا ثلاثة أيام يوتي إلينا

Dibiga Xoolaha ugu xooga weeyn oo kale ayeey ahaayeen marka laga eego dhanka jirka, 1ruux oo iyaga kamid ah cunada oow cunayo keligiis, kooxdhan ayeey ku filan tahay.

``````````````````````````````````````````````````.

Q)


القاضي والطلبة وأحد وزراء الشيخ وأتوني بكسوة، وكسوتهم فوطة خزّيشدّها الإنسان في
وسطه عوض السّراويل فانّهم لا يعرفونها، ودرّاعة من المقطع المصريّ مُعلمة، وفرجيّة (55)
من القُدْسي (56) مبطّنة وعمامة مصريّة مُعلمة، وأتو لأصحابي بكُسًى تناسبهم واتينا الجامع
فصلّينا خلْف المقصورة (57)، فلما خرج الشيخ من باب المقصورة سلّمت عليه مع القاضي،
فرحّب وتكلّم بلسانهم مع القاضي، ثم قال باللسان العربيّ : قدمت خيْر ‖ مقدم، وشرّفت

Wadaadka hadalkaas waxuu kaga hadlay bulshada dharka eey jecel yihiin waa go` dhexda lagu xerto iyo mid garabka lasaarto( lahuwdo).

Masjidka marka oow yimid waxoow ku arkay dhaqan kale Imaamka waxaa lagu yaqiinay in oow dadka meel u dhaw ku
``````````````````````````````````````````````````

dukado lkn meel gaar ah oo amaankeeda aad la ilaaliyay ayuu galay halkaas ayuuna dadka oo dhan salaada kudawa xiteen.(xiligaas waxaa badnaa dadka Masaajidka dadka ku tooriyeeyo, XASHAASHUUN ayaa looyaqiinay waana dad eey soo barbaariyeen Eeraanta shiicada ah .

waxoow kaloo sheegay in Imaamka iyo khaadiga eey kuwada hadleen Luqada loogahadlo Muqdisho .

---

Bulshada Muqdisho waxaa lasheegay in eey xiran jireen MACAWIIS ama Go` dhaqankaas dad badan ayaa nala wadaago oo waa dhaqan kasoo jeedo Hindiya.

Idriisi mar oow ka shee keeynayay Jaziirad Hindiya kutaal sidan ayuu qoran

الجزيرة ملك اسمه زنبد وأهلها سمر يلبس كل واحد منهم فوطتين
فوطة يتزر بها وفوطة يلتحف بها وميـاهم عذبة

D)

بالطعام ثلاث مرّات في اليوم وتلك عادتهم، فلمّا كان في اليوم الرابع وهو يوم الجمعة جاءني القاضي والطلبة وأحد وزراء الشيخ وأتوني بكسوة، وكسوتهم فوطة خزّيشدّها الإنسان في وسطه عوض السّراويل

halkan waxuu kaga hadlayaa dhaqanka Somalida iyo Carabta laderiska ah sida oow isku shabaho

waxuu tilmaamay in Somalida eey kulebistaan Macawiis iyo Go` shaal ah , dhaqankeena sida inbadan aan ku aragno siiba Odayaasha mintidka ah marka eey timaado ku dhegenaashaha dhaqankeena suuban

_____



الفوطة ـ المعوز

_____

R)


فصلّينا خلف المقصورة ، فلما خرج الشيخ من باب المقصورة سلّمت عليه مع القاضي، فرحّب وتكلّم بلسانهم مع القاضي، ثم قال باللسان العربيّ : قدمت خيْر مقدم، وشرّفت بلادنا وآنستنا، وخرج إلى صحن المسجد فوقف على قبْر والده وهو مدفون هنالك فقرأ ودعا ثم جاء الوزراء والأمراء ووجوه الاجناد فسلّموا، وعادتهم في السلام كعادة أهل اليمن : يضع

-Afkooda ayeey iskula hadleen marka oow leeyahay hadalkiisan waxaa kamuuqdo in eey kuwada hadli jireen Af-Somali. afka 1aad ee Dalka looga hadlo in oow ahaa AfSomali ayaa meesha kamuuqato afka labaadna in oow ahaa Afcarbeed.

-mad-habta Shaaficiga kasokoow waxaa meesha kamuuqato Madaxweeynaha in oow ahaa nin Suufi ah , waayo dhaqanka Masjid iyo qabri leesku soo dhaweeyo waa dhaqan lagu yaqaano Suufiyada. dariiqada Qaadiriga miyaa mise? Ashaaciro miyaa mise? waxaas oo dhan waxeey nooga baahan tahay baaritaan dheer oo dhoowr fiijaan oo Kafee ah loo cabay in badana lagu dul fekeray

Imaansho wanaagsan ayaad noogu timid, waxaadna sharaftay dhulkeena, wehel ayaad noo tahay”sidaas ayuu dhahay

Madaxweeynihi Xamar .

---

---

# S)

ثم جاء الوزراء والأمراء ووجوه الاجناد فسلّموا،

- Madax weeynaha dhaqan facweeyn ayaa kamuuqdo .siyaasad fog nin leh ayuu iila qaab egyahay waayo faataxo kuma maamulin Muqdisho ee muruq iyo ciidamo ayaa hareer socday una heelan in eey uqidmeeyaan shacabkooda, dowlad dalkeeda dayacday ma eheeyn sida meesha kamuuqato waayo marka oow soo gaaray markabkii siday Ibnu Batuuta badweeynta ayaa looga hortegay baaritaan xoog leh ayaana lagu sameeyay ruux walba ujeedka oow uyimid dalka ayaa laweeydiiyay isaga

oon kasoo degin Doontii siday .

- Waziirada qaab dhaqan kooda nidaam ayaa kamuuqday, waziirka qadarin ayuu leeyahay sidoo kale taliyayaasha ciidamada iyagana maamuus gaar ah ayeey leeyihiin sida warbixinta kamuuqato.

---

# SH)

بالقرب من المسجد ومشى الناس كلّهم حفاةً ورُفعت فوق رأسه أربع قباب من الحرير الملوّن، وعلى كل قبّة صورة طائرٍ من ذهب.

Dadka intooda kale ayaa nasoo raacay iyagoo cagacad ama aan kobo sidan.

Sheykha waxaa madaxiisa lagu hareeyay ama la dul hagoogay afar Daladood taasoo ka sameysan xariir midabo leh , iyadoo Daladiiba uu ku sawiranyahay shimbir midkiisu dahabi yahay.

-dhaqanka nuucaas ah waa dhaqankii boqorada waxaana kamuuqato tamashleeyn.
Madaxweeyne eey dabayaacayaan shacab cago cad waxeey

daliil utahay in oow ahaa nin Seeftiisa galka kabaxsan tahay waloow aan laheeynin cadeeyn kufilan arinkaas.

---

Wadaadkii ku caanbaxay cilmiga JOQORAAFIGA ,ee qoray Kutubka(نزهة المشتاق في اختراق الآفاق)

IDRIISI

mar oow kashee keeynayay JAZIIRADA [JUZUR AL QAMAR]

waxoow ka shee keeyay Boqorad cajiib ah oo utalin jirtay bulshada halkaas degan waa boqorad ku caan baxday in iyada xirato kobo DAHAB AH halka bulshada in teeda kale caga cad yihiin .

**#qisada Boqoradii Afrika ee Kobaha DAHABKA xirneeyd.**

Boqodara magaceeda waxaa ladhihi jiray DAMHARA

ninkeeda ayaa boqor ahaa iyadana Boqorad ayeey ka eheeyd dalka . xakunka eey ku dhawaaqdo cidna dood kama keeni jirin.

shacabka agtooda waxaa caado ka eheeyd in dumarka boqorad laga dhigo . agtooda ceeb kama eheeyn in talada laga qeeybgeliyo dumarka weliba laboqro sidii Balqiisa. Somalida waxeey ku maahmaahday "qolo waxeey ceeb u arkaan qolo kale agtooda waakacaado" .boqorada waxeey eheeyd mid aad ujecel isqurxinta TAAJ kasameeysan DAHAB ayaa madaxa loogelin jiray Taajkaas oo lagu dulxiray dhoorw Kiilo oo dheeman ah .

Boqorada waxaa caado u ah in eey xirato Kobo Dahab kasameeysan shacabka intiisa kale cagacadaan ayuu socan jiray ruuxii lagu arko isaga oo kobo xiran denbi ayeey ka eheeyd agtooda. muwaadin kobo xiran hadii la arko maxkamad ayaa lasoo taagi jiray Lugta ayaana laga ciqaabi jiray . saasoo eey tahay Boqorada waxaa caado u ah in eey bulshada usameeyso maalmo ciid ah lana damaashaado

dharqurxoon oo kasameeysan xariir ayeey soo xirtaan

maalintaas . dumarkooda madaxa madaboolaan gabar walba madaxa 10 xabo oo shanlo ah (gadhfeeydh) ayaa usuran. Boqorka iyo waziirada dusha ayeey kala socdaan qaabka eey udheceeyso damaashaadka maalintaas

Boqorada canshuur ayaa loo uruuriyaa bulshada kuwooda masaakiinta ah ayeey maalintaas kusadaqeeysaa , Maroodi dhar xariir ah loo soo xiray ayeey ku damaashaadaan ,calamo ayeey sooqaataan maalintaas DURBAANO ayaa lagaraacaa Buun ayaa layeeriyaa.

bulshada jaziiradan degan waa MAJUUS .

QISADA OO AFCARBEED KUQORAN HOOS KADAALACO

المتصلة بعضها ببعض وهي لا تحصى وأكثرها خالية وأكبرها جزيرة انبونه وهي عامرة وفيها خلق كثير يعمرونها ويعمرون ما حولها من كبار الجزائر وتتصل بهم جزيرة القمر ولجميع هذه الجزائر رئيس يجمعهم ويذب عنهم ويحامي عليهم ويهادن على قدر طاقته وزوجته تحكم بين الناس وتكلمهم ولا تستتر عنهم والرئيس زوجها حاضر لا يتكلم فيما تأمر به من جميع أوامرها وتحكيم النساء عندهم سيرة دائمة لا ينتقلون عنها واسم هذه الملكة دمهرة وهي تلبس حلة الذهب المنسوج وتحمل على رأسها تاج الذهب المكلل بأنواع اليواقيت والأحجار النفيسة وتجعل في رجليها نعل الذهب وليس يمشي أحد في هذه الجزائر بنعل إلا الملكة وحدها ومتى عثر على أحد أنه لبس النعال قطعت رجلاه وهذه الملكة في فصول مذهبها واعيادها تركب ويركب خلفها طرقها ومواضع مسيرها أنواع ثياب الحرير ولها زي حسن كما وصفنا وهذه الملكة وزوجها سكناهم من هذه الجزائر المذكورة بجزيرة انبونه. في ذاته كثير التلوين صافي الديباجة ونساء هذه الجزيرة يمشين مكشوفات الرؤوس مضفورات الشعور والمرأة الواحدة تمسك في رأسها عشرة أمشاط وأقل وأكثر وهي حليتهن وبهذا الزي تمشي نساء جزائر السحاب وأهلها مجوس وسنذكرهم فيما بعد بعون الله.

جواريها بالزي الكامل من الفيلة والرايات والأبواق والملك زوجها وجملة الوزراء يتبعونها على بعد منها ولهذه الملكة أموال تجمعها من جبايات معلومة فتتصدق بهذه الأموال على فقراء أهل بلادها في ذلك اليوم ولا تتصدق بشيء منه إلا وهي واقفة تنظر وأهل بلادها يعلقون على

qisooyinkaas aan kor kusoo xusnay waxeey daliil utahay in dhaqanka qaar aan kasoo erganay dadyoow kale . aan sii anba qaadno Ibnu Batuuta booqashadiisii Xamar

DH)

والواحد من أهل مَقْدَشُو يأكل قدر ما تاكله الجماعة منّا، عادةً لهم وهم فى نهايةٍ من ضخامة الجسوم وسِمنها،

Nin Somali ah ayaa hada kahor waxuu qabay xaas lkn hal ceeb ayeey leheed cirweeyni ayeey udhalatay lkn isagana dhib kuma heeyn taas oo waxoow lahaa Ari tiro badan maalin walba 1neef ayaa loo qali jirya .meeshuu reerka degnaa waxaa usoo martiyay nin socota ah sida dhaqanka yahay waa lasoo dhaweeyay oo geed ayaa dermo loodhigay Odaygii reerka waxoow udhaqaaqay dhanka eey xoolaha daaqayeen waxoow dhegta soo qabtay 2 wan oo aad ubuurbuuran islaatii reerka ayuu kusoo agxiray, 1 adiga ayaa iskaleh midka soo harana aniga iyo

ninka martida ah noo kari ayuu kula dardaarmay. islaanta amarka lasiiyay sidii ayeey uqaadatay oo labadoodaba dhegta ayeey dhiiga udartay oo hilbihii ayeey dheri (digsi) kuriday oo debka ayeey dulsaartay. Odaygii reerka waxoow usheekeeynayay ninkii martida ahaa waayo waa ceeb ruux marti ah in kaligiis meel lafadhiisiyo loogana dhaqaaqo halkaas cidlada ah, TV ladaawadana xiligaas majirin oo martida kaa mashquuliyo.

Hilibkii marka oow bislaaday silaantii marba cad Hilib ah sida eey ula soo bexeeysay labadii neef weey kalaacday oo lafo ayaa meesha ku soo haray lafahiina waxeey kushubtay god meesha kaqodnaa oo loo diyaariyay in qashinka lagu rido.islaanta kama xumaanin in eey kalaacday neefka iyada loogu talagalay lkn waxeey kaxumaatay in eey qadisay Odayga reerka iyo ninkii martida ahaa.

qorshe ayeey degtay si eey uga bad-baado ceeb iyo qeeylada

odayga qabay iyada .

Midiyaha laguqalay neefka ayeey dhaqaajisay kadibna waxeey uwacday Odaygii qabay marka oow uyimid ayeey dhahday orod oo halkaas kasoo qaad mindida si aan Hilbaha idinkugu diyaariyo Odaygii waxoow udhaqaaqay dhanka loogu tilmaayay Mindida inta oow ku maqnaa ayeey iyadana u dhaqaaqday dhanka oow fadhiyay ninkii martida ahaa waxeeyna dhahday ninyahoow martida noo ah ninkan iqabo waa nin hinaaso badan in oow kumarti sooro hasugin. hada ayuu kuu doontay mindiyo. Raga ayuu xubinta taranka kajaraa. hadii aad umaleeysid hadalkeeyga been waakaas soo socdo waxoow soowatana waa mindiyo. ruux dumar ah ayaan ahay itaal aan kaaga celiyo ma hayo ee talo adiga ayeey kujirtaa !

ninkii martida ahaa cagaha ayuu waxkadeyay oo waa cararay .

Odaygii reerka ayaa yimid Jikadii lagu diyaarinaya Hilbaha islaantii oo barooraneeyso ayaa durba meesha timid iyada oo

dheheeyso ninkii baas ee aad noogu sheegtay in oow yahay marti waxoow lategay Hilbaha ee kadaba tag ee kasoo dhig walbo xitaa hal xabo hanoo reebo aan ku qadeeyno.

Odaygii ooyaaban ayaa isku deyay in oow kadaba qeeyliyo ninkii lkn nin labaqdin geliyay miyaa meel dhaw lagu arkayaa ?. qisadii loogu tala galay in lagu caayo dumarka sharafta badan halkaas ayeey ku dhamaatay.

---

Oday salafi ah oo aan isku sir qarsano kana soo jeedo Laascaano waxoow iiga sheekeeyay 3 wiil in eey maalin kuqadeeyeen Rati Geel ah . duhurtii ayeey qaleen Rati xili eey lajoogeen geela habeenkii fiidka marka lagaaray oo eey soo gurya noqdeen 50 kiilo wax kayar oo Hilibah ayeey guriga keeneen. qiso taas lamid ah waxaan kamaqlay Oday reer Muqisho ah .

isku soo duuboo qisooyinka nuucaas ah waa rumeeyso ama

harumeeysan . Ibnu Batuuta hadii oow nagu tilmaamay cirweeyni waxa nalaga sheegayo waxbaa kajiro waayo sheeko xariirradaas waxbaa karun ah.

---

C)


وضربت بين يديه الطبول والأبواق
والأنفار، وأمراء الأجناد أمامه وخلْفه، والقاضي والفقهاء والشرفاء معه، ودخل إلى مشوره
على تلك الهيئة، وقعد الوزراء والأمراء ووجوه الأجناد في سقيفة هنالك، وفرش للقاضي بساط

Dubaan ayaa loogaraacay turunbo ayaa layeeriyay askarta saf ayeey kujireen midna halka oow taagan yahay kama dhaqaaqin inta eey socotay garaacista Durbaanka .

dhaqankaas weli waan leenahay waxaa jiro heesta calanka ama nashiidada calanka looqaado .

---

*waa seermaweeyd-iyo seben barwaaqo .*

*Subag weelkudaatay sina umaxumaadee, waa subax wanaagsane calankana salaama.*

---

Durbaan lagaraaco Islaamka jiritaankiisa ayuu lakoowsaday lkn ciidanka in eey saftaan buunlayeeriyo hoowsha nuucaas ah goorma ayeey soobilaabatay?

inta aanan kajawaabin su`aasha nuucaas ah waa in aan dib umilicsanaa taariiqda lasoo maray inta oowsan booqasho noogu iman Ibnu batuuta . xiliga oow soobooqanayo Muqdisho, caalamka Islaamka waxoow kasoo kabanayay dagaaladii lalagalay TATAARKA . sida aan lasocono dagaalkii lagu jebiyay Tataarka ee kadhacay CEYN-JAALUUT ee kudhow magaalada GAZA dagaalkaas waxaa hogaaminay sheeqii weeynaa Cizat ibnu cabdi salaam maalintaas sheeqa waxaa hareera socday kooxda BAAMBEEYDA xamaasada ciidamada si lookiciyo loona xusuusiyo ciziga iyo sharafta eey leedahay in ladifaaco dalka Islaamka ayaana Durbaano loo garaacayay . soodhaweeyntii Nabiga ee lagu soo dhaweeyay

Madiina iyadana waa mid muhiimadeeda leh, heesihii lagu soo dhaweeyay ama nashiidooyinkii loo qaaday maalintaas Nabiga waa mid diiwaanka taariiqda ku qoran.

Shaaficiyada +Ahlusunada dhib uma arkaan arinkaas , lkn waxaa kasoo horjeedo Xanaabilo oo diidan arinkaas xiligaas aan ka hadleeyno Xanaabilada Somaaliya kuma xooganeeyn mana lagasoo sheegin in eey farac ku lahaayeen muqdisho. dhoowr wadaad oo Abuuxaniifa mad-habtiisa heeysato ayaa jiray lkn lama dhihi karo mad-habta Xanafiyada ayaa looga dhaqmay Somaliya, waayo afar wadaad shacabka ma metelaan haba sheegto ZEYLICI ama Muqdishaawi. Mascuudi ayaa 300 H.qoray in mad-habta Shaaficiga looga dhaqmo Zeylac , sida aan ognahay Muqdisho waxeey kashidaal qaadataa Zeylac ama Jabuuti. Miqriizi ayaa sheegay in mad-habta abuu xaniifa eey kudhaqmaan Somalida lkn hadalkiisa miizaan maleh, waayo maba tegin dhul Somali degen tahay marka aan dabagal dheer

ku sameeyay Kutubkiisa .

---

G)

صلّو العصر مع الشيخ أتى جميع الأجناد ووقفوا صفوفًا على قدر مراتبهم، ثم ضربت الأطبال والأنفار والصرنايات وعند ضربها لا يتحرّك أحد ولا يتزحزح عن مقامه، ومن كان ماشيًا وقف فلم يتحرّك إلى خلف ولا إلى أمام . فإذا افرغ من ضرب الطّبلخانة سلّموا بأصابعهم كما ذكرنا وانصرفوا.

.

Qiso ayuu iiga sheekeeyay wiil Somali ah oo ku weeynaaday xiligii maamul la aanta . mar ayuu usafray qurbaha wadan kamid ah kuwa Somali laderiska ah ayuu tegay waa wiil aan arag calan loo istaago, aanan aqoon qaradinta askariga ama kan xilka dowladeed hayo, waa wiil kusoo koray xornimo iyo iska celi kii kugu soo gardaroodo. maalin ayuu shaah ka cabayay maqaayad ku garab taalo meel kudhegan laamiga waxaa lagaaray xili ladejinayay calanka wadanka isagii oo goobta fadhiyo ayaa labilaabay in lagaraaco durbaanka lana yeeriyo turunbada, shacabkii wadanka udhashay dhamaan weey sara

kaceen oo waxeey bilaabeen in eey qaadaan heesta calanka wiilkii ku soo koray dalka burbursan halkii ayuu sii fadhiyay xili eey bulshada sara kacday una istaagtay salaanta calanka. askari qiireeysan ayaa u yimid markaasuu dhahay istaag oo salaan calanka lkn wiilkii oo aanan aqoon hadalka oow ku hadlay askariga ayaa ku jawaabay fadlan igula hadal Ingiriis ama carabi marka oow intaas dhahay wiilkii ayuu askariga ugu jawaabay afkii markaas ufududaa sidii ayaana lagu fahamsiiyay wiilkii somaliga ahaa in loo istaago marka calanka lasaarayo ama marka ladejinayo qadarin laqaderinaayo calanka eey Umada ku mideeysan tahay ee shacabka hoos harsadaan .

F)

ثم يدخل الشيخ إلى داره ويقعد القاضي والوزراء وكاتب السرّ وأربعة من كبار الأمراء للفصل بين الناس وأهل الشكايات، فما كان متعلّقا بالأحكام الشرعيّة حكم فيه القاضي وما كان من سوى ذلك حكم فيه أهل الشورى وهم الوزراء والأمراء،

xakunada nuucan ah ee laga sheekeeyay waa kaculus yihiin kuwa maxkamadaha lagu qaado waayo waxaa meesha fadhiyo

xoghayaha madax weeynaha, sidoo kale waziiro iyo culimadii looga danbeeyay fiqhiga diinta islaamka . dacwada hadii eey fududahay waziiro in eey kasoo qeeyb galaan looma baahna. maadaama naloosheegay 3 wazaaradood in eey meesha xaadir kuyihiin sida qaadiga amiirada iyo xogheeynta madaxtooyada halkaas waxaa kamuuqdo in eey arin culus jirtay waxa leesku heestana eey ka culustahay lacag ama dil dhacay iyo nin xaaskiisa faraqa kudhegantahay.sikale hadii aan udhigno arinka waxaa macquul ah 3 koox sababta loo dalbaday in eey tahay si eeysan udhicin laaluush in wax lagu maamulo waayo qaadiga gurigiisa ayaa lacag lagu siin karaa, sidoo kale amiirka lkn 3 wazaaradood in la laaluusho macquul ma ahan , xiligan waxaa jiro 3 maxkamadood. hadii midan lagaaga adkaado mida 2aad ayaad dacwada ula tegi kartaa mida ugu sareeyso ayaana racfaan uqaadan kartaa .sida aan ku aragno wadamada horumaray heer aad maxkamad lakori kartid waziirka iyo wiilka oow dhalay ,

cadaalada iskuulada ayaaba loogu dhigaa bulshada iyo garoomada ciyaaraha kubada cagta & iwm.

---

Q)


وما كان مفتقرًا إلى مشاورة
السلطان كتبوا إليه فيه فيخرج لهم الجواب من حينه على ظهر البطاقة بما يقتضيه نظره
وتلك عادتهم دائما.

shaki kuma jirto in oow soo fara gelinayo madaxweeynaha hadii eey arinka murugto sida Nabiga usoo fara geliyay 2 saxaabi oo midkood lacag deeyn ah lagu lahaa.

**Af-Somali qoran miyaa jiray xiligaas?**

Cudur soo noqnoqdo ayaa jiro

markii gumeestahay wadanka kusoo duulay waxeey bulshada ku qasbeen in afkooda loo adeegsado dhamaan warqad walba oo dowlada ku saabsan . Hargeysa Ingiriis ayeey qori jireen Jabuuti Faransiis ayaa laga qori jiray Xamar Itali ayaa lagu faani jiray .

xiliga oow nooyimid Ibnu batuuta hadiiba laqori jiray Afsomali waxoow ahaa mid ku qoran xarfaha CARABIGA .sida wadanka Eraan iyo Afgaanistaan ugu qoraan afkooda xarfaha Carabiga . ajnabiga marka oow kategay Somaliya waxaa laga joogaa, wax kudhow 90 sano ama 80 sano lkn weli isticmaarka madhamaan oo weli bulshada Somaliyeed waxeey adeegsadaan Faransiis ama Ingiriis marka laqoraayo warbixinta kasoo baxdo xafiiska dowlada. Xamar ,Hargeysa ,Jabti dhamaan waxba isma dhaamaan maanta .

waxaa wax lagu qoslo ah in suuqa lasoo geliyo Somalida in eey afkooda qortaan waxaa kadanbeeyay ajnabi ! waxaan weey diin lahaa kuwa nuucaas u fekerayo ajnabi hadii oow jecel yahay in aan qorno afkeena hooyo, maanta ayuu naga deeyn lahaa qasabka oow nagu wado marka eey noqoto iskuulada waxaa lagu qasbayaa in eey qoraan Ingiriis ama Faransiis , daaqada waxaa kasoo galay oo aan waxba dhaamin Afcarbeedka , caqliga

hadii oow shaqeeyo waxaa kuu soo baxayo in ajnabiga kamideeysan yahay in ladabarjaro Afka Somaliga kuhadalkiisa iyo qoraalkiisa . marka aan uhadalno Somalida aadka ugu tacasubto afkooda hooyo adeegsigiisa dhanka qoraalka iyo ku hadalkiisaba.

---

**qeeybtan hoose waxaan kaga hadli doonaa**

**Ibnu Batuuta iyo Cunada Somalida.**

Kutubka Inbu Batuta 800 sano ayuu jirsaday

sideedaas qarni marwalba qolo ayaa ku hoowlaneed sidii eey ucusbooneeysiin leheeyd Kutubka.

sida aan ognahay hadii eey dad aad ubadan qoraan Kutubka , qof walba sida eey ula muuqato ayuu uqorayaa mana ahan QURAAN cid walba xifdisan tahay oo wixii qaldamo dhaqso loo dareemayo , Kutub walba oo taariiq ku saabsan waa in laga taxadiraa qaladaadka soo geli karo

---

**waa maxay [ما الورد)**



Rose Water ما الورد

jawa abteena waxeey tahay dhaladaas sare kaaga muuqato cadarka ku jiro ayaa lagu magacaabaa.

# ماء الورد

ماء الورد هو مادة سائلة مستخلصة من الورد الجوري، وهو بقايا إنتاج الزيوت العطرية للورد، حيث يستخدم هذا الماء في اضافة نكهة لبعض الأطعمة ويضاف أحياناً للمواد التجميلية، وفوائد ماء الورد للبشرة معروفة لا تخفى على أحد أبداً، ونحن هنا بصدد ذكرها بشكل تفصيلي.

# تاريخ جمالي

**لقد عرف ماء الورد كمصدر جمالي منذ العصور القديمة واستخدم في كثير من الدول والبلدان على مر الزمان:**

- كانت تتجمل به أجمل ملكات الكون (كيلو بترا).
- استخدمته النساء الفارسيات في بلاد فارس في مواسم الأفراح.
- كان يستخدم في أوروبا في العصور الوسطى لطرد الأرواح.
- من أهم مكوّنات الغذاء للعائلة المالكة الهندية.
- أمّا في العصر الحديث وفي زمننا هذا فقد استخدم ماء الورد في تحضير العديد من مستحضرات التجميل الصناعية المنشأ.

waa maxay [قمقم ]

## تعريف و معنى قمقم في معجم المعاني الجامع - معجم عربي عربي

1. قُمقَمَ: (فعل)
   - قَمقَمَ يقَمقِم ، قُمْقَمةً ، فهو مُقَمْقِم ، والمفعول مُقَمْقَم
   - قُمْقَمَ الشَّيْءَ : جَمَعَهُ
2. قُمقُم: (اسم)
   - الجمع : قَماقِمُ
   - قُمقُم : إِنَاءٌ مِنْ مَعْدِنٍ فِضِّيٍّ أَوْ نُحَاسِيٍّ يُجْعَلُ فِيهِ مَاءُ الزَّهْرِ وَنَحْوُهُ ، يُرَشُّ مِنْهُ عَلَى الضُّيُوفِ
   - قُمقُم : إِنَاءٌ مِنْ نُحَاسٍ وَغَيْرِهِ يُسَخَّنُ فِيهِ الْمَاءُ وَيَكُونُ ضَيِّقَ الرَّأْسِ
   - قُمقُم : وِعَاءٌ خُرَافِيٌّ كَانَ مَحْبَساً لِلْعَفَارِيتِ وَالشَّيَاطِينِ
   - القُمْقُمُ : إناءٌ صغيرٌ من نحاس أو فِضَّة أو خَزَفٍ صِينيّ يجعل فيه ماءُ الورد



قمقم من الزجاج

**qisada qaabkee ayeey ku qurxooneeyd in loo qoro?**

sida oow noosheegay Ibnu batuta maalinta jimcaha eheeyd waxaa lookeenay dhar oow ku aado masjidka jaamaca ah .

wuu inoosheegay qaabka eey u ekaayeen dharka loo keenay .

sidoo kale waxaa meesha kamuuqato in loo keenay

cadar oow isku carfiyo carakaas waxoow kujiray weelasha sare kaaga muuqdo

cadarkaas waxaa laga keenay SUURIYA .

ujeedka qisadan aan uqornay waa in aan garab marno sida oow noogu turjumay XEEYLE oo ah sidan

[Waxaa kale aw inoo keenay weel uu ku jiro sharbeed ama cabitaanka loo yaqaano Biyo-wardiga, (Maa-ul wardi Al-Dimishiqi), biyahaas ayuu wiilkii aniga iyo Qaadiga noo shubay]

_____



العنبا

المانجو

Canbo ayaa kamid ahaa waxyaabihii aan cunay "sidaas ayuu sheegay. hadaba canbo laga dhigay khal, Hindiya ayaa laga isticmaalaa sida qoraalka hoose kamuuqdo

وقد يوجد ببلاد الهند نبات يسمى (نزهة المشتاق في اختراق الآفاق)

العنبا وهو شجر كبير يشبه شجر الجوز وودقه كودقه وله ثمر مثل

ثمر المقل حلو إذا عقد في أوله ويجمع في ذلك الحين فيعمل بالخل

فيكون طعمه كطعم الزيتون سواء

bog.85



Awraaqu tanbuul



Awraaqu tanbuul: sawirkeeda sare ayuu kamuuqdaa waana geed aan macaan lagu arag waa qaraar sida dhegayaraha ayuu usoo dhadhamaa sida kutubada eey tilmaameen

_____

Moos isagoo aan weli bislaan, laguna kariyay caano dhaay ah, ayaa lasoo saaray labo weel oo midkood uu ku jiro mooskii karsanaa, midka kalena ay ku jiraan caanihii lagu kariyay.

---

**xiligan lajoogo majiraa Moos lakariyo?**

waa jiraa Moos la kariyo, waxaa jiro Mooska mid aan lacunin isaga oo aan lakarin waana ku caan koonfurta Somaliya .

---



الفوفل



Beetle_palm الفوفل

## dhibka naga heesto turjumid la aanta

sida aan kadheregsanahay waqtigii Islaamka xoogeestay Dowladii wagaas jirtay waxeeyqarash xoogbadan ku bixisay sidii loo turjumi lahaa Buugaagtii ugu muhiimsaneed waagaas . hadaba Somalida maxaa lagudboon?

Xamar iyo Hargeeysa, Jabati iyo Garowe dhamaan waxaa kafuran Jaamacado waxeey lacag kaqaadaan arday Somaliyeed waxeeyna ku qasbaan in eey soo bartaan afka Ingiriiska ama Afcarbeedka.

weey fiican tahay in afkale labarto waayo waxoow lamid yahay adiga oo lagu siiyay furihii lagu furan lahaa albaabada aqoonta lkn ardayda waxeey xaq u leeyihiin in loo turjumaano buugaagta ugu qaalisan eeyna helaan isaga oo lagu qoray Luqadooda hooyo waayo bilaash kuma dhigtaan jaamacadaha, lkn qarashka si oow ugu baaqdo ayeeysan xil iska saarin sidii ardayga uheli lahaa Buug afkiisa hooyo loogu soo tebiyay .

**qarash badan miyaa ku kacayo tarjumaada?**

1buug oo kakooban 200 xaanshi ruuxa Somali joogo hadii ladhaho soo turjum qarashka lagu siinayo waa 1000.U.S.D. (kun doolar ) in oow diidi lahaa ilama ahan.

hadii loowaasho haba looga dhigo $2000. qidmadaas yar bal u qeeybi 4 jaamacadood tiiba $500 wax kayar ayaa kusoo aadi leheeyd . bal kawaran hadii sanad walba eey xil iska saari lahaayeen in eey tarjumaan 1buug kaliya? wax nuxur leh oo lataaban karo ayaa meesha kasoo bixi lahaa.

_____

## dhaliilaha oow leeyahay Ibnu batuuta!

1- isbuuc kabadan majoogin Muqdisho.

sadax maalin waxoow kusugnaa guriga ladejiyay meesha waxaa kamuuqato in oowsan kabixin guriga

2-warbixin nagama siin Suuqyada magaalada. qaab nololeedka bulshada .maciishada qaali miyaa mise waa raqiis?

3- ma oowsan kawaramin Lacagta magaalada laga isticmaalo, lacagaha qalaad miyeey isticmaali jireen mise mid Somalida ugaar ah ? ama waxeey noolaayeen Lacag la aan sida wadamada qaar ee waagaas jiray.

4-Dareeska ciidanka, hubka eey ku dagaalamaan? Calanka wadanka nuuca oow yahay waxaasoo idil kama oowsan hadlin. halkaas ayaan ku joojinay faalooyinka aan ka bixinay

SOCDAALKII, Ibnu Batuuta.

_____

**#Fariinta Shinbiro malagu raray(Shinbirkii Boosta ka shaqeeyay)**





xiligii Dowladii reer Faadumo masar katalineeysay ayaa la

bilaabay in Shinbir warqad lagu raro loona adeegsado in oow fariinta dadka ukala gudbiyo qaabka aan maanta E-mailka@. udirno ama boostada aan waraaqaha iskugu dirno ayeey ushaqeey jireen shinbiraha .

waloow Quraanka eey ku cadahay in Nabi Suleeymaan oow ahaa ruuxii ugu horeeyay ee adeegsaday shinbir fariin qaado.

## Somalida iyo adeegsiga shinbiraha

Caruurta magaalada degan waxeey xaafada kuheestaan Qooleey .

qooleeyda ayaa 2 nuuc kala ah, qooleey duureed iyo mida magaalada

waana ku caan Muqdisho qooleeyda . qooleeyda hadii laga soo daayo meel fog weeykala taqaanaa xaafadaha oo kama lunto gurigeeda, galab dheer ayeeyna soo hoyataa. hadii eey meel kale ku dhaxdo malin 2aad ayeey soo xaadirtaa.

cadeeyn dhab ah looma haayo in Somalida u adeegsadeen

Qooleeydaas qaabka Boostada oo waraaqo leeskugu diray , lkn gabay abwaan Somali tiriyay kadibna loo bedelay hees ereyadiisa waxaa kamuuqdo in shinbirka la adeegsan jiray Ereyadiisa oo aan qeeyb kasoo tegay hoos ka aqriso.

*Shinbiryahoow maduushaa madabeeyla raacdaa dadka ma-u-adeegtaa oo ma-u-dadaashaa?*

*Shinbiryoow dawaafee kuduljooga laantoow aan kuu dansheegtee , dood kuula, aadee , soo dego agteeyda."soosaar dushaadoo bada soodabaaloo soomaax daruurtoo..*

---

# MARKA,MARKO

900 H.

Ayaa la sheegaa in la bilaabay dhismaheeda

Carab iyo Barbar ayaana deganaa

BARBAR = SOMALIDA

Waxa loogu naaneesay BARBAR waxeey waagoodii hore eey degi jireen BARBARA.

qoraagii lagu magacaabi jiray IDRIISI

ee Carbeed [1155.M.]

Waxoow yiri "Reer **Marka** waa dad Beera leey ah webi ayaa ku yaalo oo dhinac yadiisa lagu tacbo Galeey"

Waxoowna ula jeeday Webiga Shabele.

---

ومن جوة إلى قرقونة يومان في البحر وعليها جبل عظيم يمتد في جهة الجنوب. ومن قرقونة إلى برمة ثالثة ايام في البحر،
Boorama

ويبتدؤ منها جبل حافون وهو جبل له سبعة رؤوس خارجة ويمتد تحت الماء في البحر أربعة وأربعين ميال، وتلي رؤوس هذا
Xaafuun

الجبل بالد صغار كالقرى يقال لها الهاوية. ومن حافون إلى مركة على الساحل ثالثة مجار صغار وفي البر سبعة أيام. وعلى
MARKA

مرحلتين من مركة في البرية واد يمد كمد النيل وعليه يزرعون الذرة. ومن مركة إلى بالد النجا على البحر يوم ونصف يوم.

والنجا آخر أرض بربرة.

Qoraagii ku taqasusay Juquraafiga

ee lagu magacaabi jiray YAAQUUT AL XAMAWI

Waxoow sheegay isagana in qoomiyada BARBAR ee madoow eey deganyihiin

ZEYLAC ilaa laga gaaro MARKA

Waxaana la deris ah ZUNJI = JAREER .

---

Waxaan layaabay kuwa ka shee keeyo Taariiqda aan meelna kuqorneey , ee dhahayo dhulkaan waxaa asal deganaan Qoomiyada OORMADA .

Waa run in Islaamka oowsan kala lahaan jirin xuduudo kala xiran ruux walba meeshii oow doono in oow degi jiray

lkn Taariiqda Ibnu batuuta iyo Yaaquut alxamawi & Idriisi Waxeey qirayaan in Somali eey deganaan jireen dhulkan maanta eey Somalida degan tahay

Oromo dhulka eey degan yihiin maanta waa kabaaxad ween yahay dhulka Somalida eey degto hadii leesku geeyo

mana ubaahna in eey meel kale uhayaamaan. Geel dhaqato ma

ahan Somalida ayaa kaga wanaagsan Geela iyo Idaha dhaqashadooda.Oromada hadii aan ka dalbano in eey dhulka noo kala dooriyaan weey diidayaan waayo dhulkooda ayaa kheey-raadka ku badan yahay kuna wanaagsan beerashada.

---

## Deegaanka

-Dadka waagii hore waxeey agdegi jiren Bad meel eey ka ag dhowdahay si Doomo loo raaco hadii eey colaad dhacdo ama Musiibo kale ,sidoo kale marka larabo in Ganacsi loo iib geeyo wadama kale waxaa muhiim ahaa in la helo Bad.

-Waxeey ka ag dhawaan jireen meel Biyo laga helikaro.

leh Webi ama Ceel si fudud Biyo looga helikaro aanan gureeynin.

waxii ka danbeeyay ,taariiqda 1800 ,M. weey isbadaleen dadka waxeey daneeyaan Magaaladee leh wadooyin waa weeyn

| مختصر عبد الله الهرري – مذهب الإمام مالك | شيخ الإسلام الهرري |
| مختصر عبد الله الهرري – مذهب الإمام أبي حنيفة | شيخ الإسلام الهرري |
| البيان الموثق دراسة موثقة لمقالات الفرق الثلاث | شيخ الإسلام الهرري |
| متن الصراط المستقيم | شيخ الإسلام الهرري |
| A Brief Explanation Of The Summary Of ^Abdullah Al–Harariyy | Shaykh al Islam Abdullah Al–Harariyy |
| الروائح الزكية في مولد خير البرية | شيخ الإسلام الهرري |
| مختصر كتاب الكواكب الدرية في مدح خير البرية المسماة البردة | شيخ الإسلام الهرري |
| الدليل الشرعي على إثبات عصيان من قاتلهم علي من صحابي أو تابعي | شيخ الإسلام الهرري |
| كتاب نصرة التعقب الحثيث على ما طعن فيما صح من الحديث | شيخ الإسلام عبد الله الهرري |
| الفرض العيني في صفحات حل ألفاظ المختصر | تلاميذ شيخ الإسلام الهرري |
| الدرة البهية في حل ألفاظ العقيدة الطحاوية | شيخ الإسلام الهرري |
| مختصر عبد الله الهرري الكافل بعلم الدين الضروري | شيخ الإسلام الهرري |
| صريح البيان في الرد على من خالف القرآن – الجزء الثاني | شيخ الإسلام الهرري |
| صريح البيان في الرد على من خالف القرآن – الجزء الأول | شيخ الإسلام الهرري |
| المقالات السنية في كشف ضلالات أحمد بن تيمية | شيخ الإسلام الهرري |
| الدر النضيد في أحكام التجويد | شيخ الإسلام الهرري |
| رسالة في بطلان دعوى أولية النور المحمدي | شيخ الإسلام الهرري |
| حل ألفاظ مختصر عبد الله الهرري | شيخ الإسلام الهرري |
| الشرح القويم في حل ألفاظ الصراط المستقيم | شيخ الإسلام الهرري |
| عمدة الراغب في مختصر بغية الطالب | شيخ الإسلام الهرري |





**Sheeqa Somalida maxeey u hilmaantay?**

Sheeqan waxa loo soo hadalqaadi waayay siiba Bulshada Somali dhexdeeda

waxaa loo aaneeyaa dhoowr arimood .

-Sheeqa ma eheeyn sheeq ku kooban Bulshada degan geeska aAfrika oo kaliya nin socod badan ayuu ahaa .

- Afsomali nin ku hadlo ma eheeyn hadii oow yaqiinay garam-garam wax madhaamin ( Afsoomali badan oo gaarsiisan in Diin lagu faafiyo ma aqoonin sheeqa .)

-Sheeqa in ladayaco waxaa loo aaneeyaa kama oowsan dhalan , Dir, Daarood, Digil & Mirifle & Beelaha ku bahoobay Hawiye-nimo , hadii oow kadhalan lahaa kuwaas aan soo sheegnay waa hore ayeey amaan kaga dul dhici lahaayeen .

Bulshada degan Harar ayuu asal ahaan kasoo jeedaa sheqa. Soomalida faan kufilan weey heshay hadiiba Hargeeysa iyo Harar cilmigii laga xanbaaray lagu aasay Libnaan.

sh.qa waxuu ku aasan yahay Wadanka Libnaan.

---

**Dhameestir la aanta Somalida ku dhacday** Sheeqa waa ka badbaaday, moowduuc labilaabo dhex looga tago isaga oo qabyo ah Somali waa udhaqan.

**Hooyada Somalida ah 3 caruur** marka eey dhasho lana qabay 3 sano oo xiriir ah , dulqaadkii ayaa ka dhamaado , dhaqashada reerka isaga oo dhex sii marayo ayeey

Ku-leetiga ku dhegtaa kii qabay dulqaad eey ilmaha ku korsato maleh kuna heeysato kiiqabay si oow ula koriyo caruurta aan caqliga gaarin, warqadeeyda isii ayeey kusoo dhamaataa, jaceeylkii shalay leesku soo guursaday waa guray 3 sano kadib.

Reeraha weli aankala tegin dan ayeey moodeen sidaas waayo ruux walba waxoow kacabsi qabaa in Sariirta lagu cidleeyo .

calafka oon weli dhamaan ayuu reerkooda ku dhisanyahay ee

Caruurta isla korsada inbadan reeraha Somalida sidaas kuma fekeraan .dhameestir la aan ayaa ku dhacday.

---

**Waziirka sanadka ugu horeeyo**

ayuu firfircoonyahay.

isaga ayaa kacaajisaayo shaqada

ama shacabka ayaa kaxiisa dhacayo. caay hadii loo sooqoro waa iska casilayaa xilka ,istiqaalada haleeyga aqbalo, sidaas ayuu dhahayaa, waa dhaqanka cusub ee somalida cusub.

---

**macalinka waa kaxiisa dhacayaa Ardayda.**

macalinka ardayda ayuu dhahayaa

Kutubka Buqaari soo iibsada, marka eey keensadaan dhoowr isbuuc marka loo aqriyo ayuu meel usafrayaa , marka oow soo noqdo waxoow dhahayaa naga daaya kii hore , suuqa taga ee soo iibsada Kutubka saxiixul-Muslim.

isna dhoowr maalin markii la aqriyo, qaanada ayeey kuridaan weeyna kacaajisaan.

waxaa iiga sheekeeyay arinkaas wadaad Gerdheere ah oo aan meel kula kulmay ,qisadaas ayuu iisheegay in eey dhinacooda kajirto.

dhankeena shiid ayaa kajiro Lacagtii lagu soo iibin lahaa Kutubada maba heeysano 1 Kutub ayaan ku aqrisanaa 5 ruux.Qoorta ayaaa naxanuunto.

shanjeer iyo kadaban waa lagu soo celceliyaa ,lagayaabee in lagu dhaho soo xifdi ,waayo hadii laguu diro mid cusub Lacag aad kusoo iibsato jeebka kumajirto. cid danyar ahna waad ka dhalatay .

Hooyo Suuqa Yaanyo ku gado wax jeebkeeda laga shaxaaday laga yaabee in aad ku soo iibsatay, ama Hooyo Muufo-tinaar Suuqa uga furan yahay

---

**Iskuulka dhex ayaa looga tagaa!**

nolosheeyda hal mar ayaan iskaqoray fasal lagu barto English (ingiriis) .

. ardaydii aan isku mar biloownay Iskuulka 3 bil kama soo wareegin

hal-hal ayeey uga hareen Iskuulka , aniga qaasatan qasaaro ayaa iga soo gaartay arinkaas waayo heblo & heblaayo weey ka hareen Iskuulka ,damac ayaa iiga juray oo waxaan islahaa , darxumada iyo duruufta dhanak dumarka ah, ee kula deristay ameey dhankaada soo deyaan oo aad ka heshaa mid debka kuushido" caku dumar iyaga oon kula tashan ayeey iska daayaan duruusta "

laga yaabee in aad iweeydiin leheeyd . maka heshay hamigaada siduu rabay halkaas?

su`aashaas jawaabteeda waxeeytahay . maanan helin hamigeeyga . hablo dumar sidoodaba had iyo goor waxaadan

heeyn beey ku heeybinayaan.

**isla dhigashada Iskuulka Rag & Dumar** dhib ayaan ku qabnaa!.

shalay oo jimce eheeyd adiga oo kasoo dhergay canbuulo & Macsaro . (Kurbin kuleeyl dartiis qaac samada usii deeysay) Bun madoobe Macsaro ama Subag lo`aad lagu dubay .



-maanta waa sabti calooshaada shalay waxeey soo cuntay waad ogeeyd waa Digir. Iskuulka cida kula dhigato waa isku dhaf Rag iyo Dumar. Iskuulka daaqad laga neefsado waa

leeyahay weeyna furantahay lkn qaboojiye kuma xirna.waa neefta isku celi saacadaha leeysla fadhiyo Fasalka dhexdiisa. Caruur edebdaran laga yaabee in eey iskuulka kula dhigtaan iyagoo hawada caaq ku siidaayay ayeey dusha ka saarayaan , heblaayo iyo heblo.

xafiiska shaqada dhibkaas mid lamid ah ayaa kajiro lkn Qaboojiye ayaa ku xiran oo lama dareemayo qofkii xumeeyo cimilada udgoon ee caadiga ah.

---

Imaam Xasan albana marka oow leeyahay Fasalka Dumarka iyo raga hala kala saaro, xigmadaas ayaa ku qarsoon hadalkiisa, in la kala nafiso ayuu bulshada kula taliyay .

---

**Maqaayad cunto macaan lagu kariyo**

hadii Somalida eey meel kafuraan Maqaayad . Kuuga iyo kii lahaa ayaa isku dhaco ,dhoowr bilood marka eey furnaato

iyada oo albaabada loo laabay ayaad arkeeysaa (maqaayad Kuug ayeey ku socotaa, milkiilaha maalkiisa lagama maarmo)

**aan usoo noqono qisadii sheeqa.**

Harar halagu mehriyo Wahaabiyo sheeqa maxoow ku diiday?

warsuuqeedka waxoow sheegayaa in shukaansi iyo wada sheekeeysi kadhexeeyo magaalada Harar iyo cida kor kuxusan .

wada-sheekeeysiga waxaa ka horeeyo wax isa-siin .

hadiyado waa in loo geeyaa & dhoowr Kartoon oo Timir ah dhoowr bundad oo dhar huudheey ubadan waa in lagu harqiyaa magaalada .

**magaalada Hargeeysa weey rimantahay** waxeey dhali doonto Rabi ayaa og.

Xamar waa hore ayaa lala aqal galay oo waxeey dhashay Gabar Hooyadeed cijeeysatay." qisadii Hargaha iyo saamaha & Shaamoow".

---

**-dhameeystir la`aanta amaanta Gazaali**

Gerdheere waakucaan arinkaas.

hadakahor wadaad Gerdheere ah ayaa naga balan qaaday in oow ka sheekeeyi doono waxqabadkii Imaam Al-Gazaali.

2 maqaal marka oow soo qoray oo lagu amaanayo Gazaali waa kacaajisay waxoowna kuxejiyay 10 maqaal oo kusaabsan wax kasheega Gazaali.

---

**dhameeystir la aanta afareeyda Abgaal ismaan**

waxaa jirto Ustuuro eey iskugu sheekeeyaan Odayaasha Beesha Abgaal

waxeeyna sheegaan in hadakahor magaalada Xamar eey soo degeen qaar udhashay Beesha Waceeysle gaar ahaan bahda Macalin dhiblaabe.

waxeey damceen in eey Masaajid ka dhistaan Magaalada.

inmudo ah markii eey ku hoowlanaayeen dhismaha Masjidka wuu dhamaaday . maalinta xariga lagajarayay Masjidka waxeey ku cazuumeen Xer kasoojeedo Beesha Wacbuudhan , marka lagaaray gabaldhaca, ee lajoogo gunaanudka xaflada, Beeshii Masjidka dhistay waxeey dhahday shirib ayaan tirinay aan ugu talagalnay in aan ku amaano muqaalka Masjidka , waxaa loogu jawaabay bal namaqashiiya si aan ugaarsiino beelaha kale ee Somaliyeed .

laashinka Beesha ayaa laga codsaday in oow tiriyo shiribka lagu balansanaa .

*" Masaajidkaan Masaajidkaan "*

hadalkaas kor kuqoran ayuu dhaafsiin waayay amaantii laga sugayay laashinka loo xilsaaray in oow amaano Masjidka Oday laashin ahaa oo udhashay Beesha Wacbuudhan ayaa udhameeystiray oo yiri

" *Masaajidkaan Masaajidkaan Maxaacadoow tanya Mareeg waa kamuuqayaa"*

---

-qabiilka aan ka sheekeeynay waxoow kamidyahay Beelaha Hawiye .

-Laashin waxaa loola jeedaa ninka gabyaaga ah .

-afareey waxeey kadhigantahay tixyar oo gabay ah .

-Mareeg waa magac magaalo .

[Qaamuuska magacyada Qabiilada Somaliyeed ayaan soo wadnaa ee lasoco qeeybaha hoose. ]

---

**dhameestir la aanta Kubada cagta.**

kii soo bartay sida loociyaaro Kubada maalinta lagubalamo barxada laguciyaaro Banooniga .

baaska loo dhigay. taa geerayaashana usacabtumeen . inaga ayaa wadano hada ayeey soo dhawdahay gool, ladhaliyo sidii aan isku leheen

marka loo dhawaaday shabaqa, Kubadii ayuu birta dulmarsiiyay .

- gurigeena laguma ciyaareeynin.

- Garoonka ayaa nagu cusbaay.

- Kobaha aan xirnaa weey igu cusbaayeen .

-waa leeygu oriyay.

kooxdeena Marmarsiiyo mawaayaan.

---

Sheeqa moowduuciisa qabyo ugama tegin mana noqon xiisooloow afar xaraf marka oow qoro Qalinka meel iska dhigo.

.1910……..1998.

Safarkii dheeraa gulufkii oow kuqaaday reerka kale, ee cudurka shaafici diidka ku dhacay sheeqa meel ayuu kaga soo haray .

Sheeq Ibnu teeymiya daandaansiga isaga ayaa bilaabay weliba tacasub aan weligiis la arag ayuu saaxada lasoo galay.

Manoqon sidii Ibnu joowzi abulfaraj ,

Xanbaliyada in loo tacasubo ibnu-Teeymiya ayaa lagu ogaa

waxaa kadaray oo gacan kahadal bilaabay ardaygii sheeda , Maxamad Cabdi wahaab .

xertii lasoo baray gaardi ciyaarka . xadrada ku dhisan cida kaa soo horjeedo xasuuq. weli hubka sidii ayeey usitaan , waa madaalayaal aan ka daalin difaacida mad-habta .

dhiig Islaam maxeey ta-wiil ku baneesteen Wahaabiyada.

---

**Sheeqa dhalasho ahaan Carab ayuu kasoo jeeda weliba Qureeysh.**

ادْعُوهُمْ لِآبَائِهِمْ هُوَ أَقْسَطُ عِنْدَ اللَّهِ فَإِنْ لَمْ تَعْلَمُوا آبَاءَهُمْ فَإِخْوَانُكُمْ فِي الدِّينِ

\الأحزاب5

Aabaheey aniga ,aayaa aqaano. asalkeeyga aniga ayaa og halka oow kasoo jeedo.

Tagtadeeyda aniga ayaa og. tixraac meel kale ha udoonan Quraanka waxoow leeyahay ruux walba Aabahii dhalay haloogu abtiriyo , bal kawaran hadii shaqsiga ku leeyahay

hebel ayaa idhalay . kuma dhalin ee aniga ayaa og kii ku dhalay, in ladhaho sidaas waa Quraanka oo lagarab maray iyo aflagaado ruuxa loo geeysanayo.

Suufiyada nin eey saameeyn nagu yeelatay ha moodin .

Somalida iyo Amxaaro & Oromo sidoo kale dadka degan Kenya ee ku hadlo luqada Sawaxiliga sinji ahaan dhiig Carbeed ayaa kujiro . hadalkaas laablakac ama nin jecleeysi ma ahan ee waa cilmiga DNA , dadkii tijaabada lagu sameeyay waxaa loo xaqiijiyay in dhiig Carbeed oow ku jiro.

[D,N,A meelo badan ayaan kaga hadali doonaa lasoco qeeybaha hoose. ]

Ibnu Khalduun oo kawaramayo in Qureeysh eey kumilantay dadyoowga daafaha dunida ku kala nool sidan ayuu qoray.

ومنهم بنو سليمان بن عبدالله الكامل ، كان من عقبه ملوك اليمامة
بنو محمد الاخيضر بن يوسف بن ابراهيم بن موسى الجون ، ومنهم
بنو صالح بن موسى بن عبدالله الساقي ويلقب بأبي الكرام بن
موسى الجون ، وهم الذين كانوا ملوكاً بغانة من بلاد السودان
بالمغرب الاقصى ، وعقبهم هنالك معروفون .

Qureeysh Gaana oo kaliya ma degin, Suudaan iyo wadamo aad utirabadan ayeey ku milmeen.

---

**Xiriika Xabashida iyo Carabta taariiq ahaan**

Xabashi markii eey qaateen diinta Masiixiga waxeey bilaabeen in eey ku fidiyaan dhulkii carabta waxeeyna qabsadeen Yaman Nabiga dhalashadiisa kahor , Abraha waxoow dagaal ku qaaday Kacbada isaga oo kasooduulay dhulka Yamaneed halkaas oow saldhig ku lahaa bulshadii halkaas deganeeyd waxeey ahaayeen dad Carab ah lkn diintooda eey tahay Masiixiyad.

Culimada ku xeeldheer Afafka sida (Cabdala Mansuur )waxeey sheegaan in eey bah wadaag yihiin Amxaariga iyo Carabiga iyo Sawaaxiliga iyo dhoowr af oo kale.

qisadii sheeq Hereri halkaas hanoo joogto.

hana la aqriyo Kutubada oow qoray Sheeqa.

<<<DHAMAAD >>>

_____

## wax kasheega Cabdalla cumar Mansuur.




maanta moowduuc nabada kusaabsan meeshan kuma qoreeyno , Oday 90 jir ah ayaan karbaash usidanaa ,goowsahiisa in aan soo tirino uma socono lkn qaladkii oow nagaqoray , wax qaloocintiisa Umada usoo bandhiga ayeey naga tahay.

---

Buugiisa gogoldhig waxoow uga dhigay wax kasheega beelaha

dulman sida kuwan hoos ku qoran

boga 116.....117 waxoow ku qoray warbixin dheer oo lagu xoojinayo in Yibro iyo Yahuud wada dhasheen ama diintood eey tahay tii Yahuuda. waa mashruuc dheer oo Buuga oodhan lagubaahiyay . siiba wax kasheega Qabiiladaas dulman.

bal eeg boga 170 waxaaqoran sidan .


"...*Yibraha* laba kitaab bay qabaan oo kala duwan, mid iyaga u gaar ah iyo midka Muslimka, sidaas oo kale laba af bay ku hadlaan, Af Soomaaliga iyo mid ayaga u gaar ah...".

(fikir ahaan waxaa leesku raacsan yahay in ladifaaco bulshada rayidka ah siiba kuwa lagu tilmaamo bulshada laga tirada badan yahay, ama lafaquuqo )

## Midgaan Muslim miyeey ahaayeen mise?

Mansuur marka oow ka hadlayo Yibir ama midgaan waxuu qoray in eey lahaayeen 2 Kutub

kan Islaamka iyo mid iyaga ugaar ah .

Odayga marka oow hadalada nuucaas ah kasoo rarayo gaalada weliba oowsan naqdi ahaan usoo rarin ee oow ku macaansanayo gaalka hadaladiisa , si eey daliil ugu noqoto in Bulshada Somaliyeed qaarkamid ah gaalo yihiin eeyna heestaan Kutub diineed aanan Islaam eheeyn.

taas waxeey cadeeyn utahay maskaxda kujirto in eey noqotay mid isku dhexyaacday .

**midgaan Kutub ayeey heestaan aanan Islaam eheeyn waa wax lagu farxo hadii eey xaqiiq tahay**!

sida aan ka warqabno qoraalka Af-Somaliga waxaa labilaabay 1970 iyo wixii kadanbeeyay, odayga weeysada ayaa kaburtay oo maskaxdiisa mafadhin marka oow soo raray in Somalida qaar eey lahaayeen qoraalo latixraaci karo ama Buugaag .

Jaamacada Umada nin macalin ka ahaa hadana Buugiisa quraafaadka nuucaas ah kusoo darayo waa wax laga

yaqyaqsoodo.

**Mansuur nin Qabyaalad lagu tuhmo ma ahan** lkn hadii ladhihi lahaa bulshada Beeydhabo waa gaalo , jirka ayaa dibaaxin lahaa qalin in oow ku difaaco ayuu isku deyi lahaa , lkn maadaama oowsan kadhalan Midgaan iyo Yibir Qalinkiisa waxuu doono ayuu kuqoray .

Bulshodhan oo 100% Muslim ah marka aad usoo qortid Kutub kale ayaad leedihiin aanan Islaam eheeyn taas waxeey toosh ku ifin ku-tahay bulsho markoodii horaba dulmaneeyd in dhiigooda, hantidooda iyo cirdigooda la baneesto.

**Mansuur qiil waa loo heli karaa** waa nin duqnimo eey kadaba timid 80 sano korudhaafay ruuxa 80 jir hadii oowgaaro waxa oow qoro kasoo qaad maleh , Bukhaari waa diiday in oow xadiis kaqaato ruux 80 jirsaday.

---

Mansuur ma ahan diinta Islaamka nin lagu yaqiinay oo

cilmiga diinta nin loo doonto ma ahan . cilmiga oow ku taqasusay waa luqada & naxwaha Afsomaliga iyo lahjadaha Somalida .waa xaqiiq in oow yaqaano dhoowr luqadood lkn gaariga sida loo kaxeeyo ayaan soo bartay iyo darawal-nimo ayaa maalin walba ku shaqeestaa farqi ayaa u dhexeeyo, afcarbeed ayaan aqaanaa iyo diin ayaan soo bartay waa 2 sheey oo ubaahan in aan leesku qaldin.

Abuu jahal af-carbeed ayuu ku hadli jiray lkn nin diinta Islaamka wax lagaweeydiiyo ma eheeyn .

---

**Midgaan asal ahaan waxeey kasoo jeedaan Rendille sida oow aaminsan yahay Mansuur.**



Dadka la yiraahdo *Rendille*, oo af ahaan iyo dhaqan ahaanba ay Soomaalida aad isaga dhow yihiin oo diinta Islaamka aan weli si fiican u gaarin, waxay bulshadooda u qaybiyaan laba kooxood: *Iibire* (oo ah wadaaddo) *iyo wakh¹-kamur* (oo ah caamadooda), sida ay Soomaaliduba caado u ahayd in bulshadeeda u qaybiso *culumo iyo caamo* ama *wadaad iyo waranle*. Sidoo kale laba qolo oo la kala yiraahdo *Gabra iyo Sakuye*, oo af ahaan la Oromeeyey (*eeg* CUT.6.4.), laakiin qaabkooda iyo dhaqankooda uu aad ugu dhow yahay Soomaalida. ayaa iyaguna bulshadooda u kala saara: *Yiblo iyo*

Bog.170

qisada nuucaas ah waaba qiso lagu qoslo waayo Somalida weey ka fac weeyntahay in ladhaho waxaad kasoo farcanteen Qabiil yar oo xooladhaqato ubadan kuna nool Kenya .weey fiicnaan leheeyd hadii oow dhihi lahaa Qabiiladaas waa Somali naga luntay ee dhalasho hala siiyo Diintana halagu soo daro . hiil iyo hoo haloo fidiyo iyaga iyo Walaalada Afrikaanta kale ee dhiban , lkn jaantaa rogan ayuu kadhigay arinka marka oow mugdi geliyay Qabiil-dhalad ah oo layaqaano sinjigooda iyo faracooda halka oow kasoo jeedo.

---

**Qisadii Waraabaha xayeesiiska loo sameeyay!**

[qisada Waraabaha waa sheeko xariir maan curis ah aniga ayaa alifay lasoco qisada ,Dad waxaa soo baxay qisooyinka & heesaha dhanka eey usocdeen ka weeciyo kuwa nuucaas ah hada ayaan ka sii afeefanayaa oo waxaan leeyahay qisadaan maloogu tala gelin in wax looga sheego Midgaan mana quseeyso Qabiil Somaliyeed.Abwaan nimada waa hibo Eebbe bixiyo waxeeyna lamid tahay Caano dhaay ah oo suuqa la keenay , Dadka kan ugu doqonsan waa ninka aan waxba Suuqa keensan lkn Liin dhanaan suuqa caanaha la wareegayo si caanaha ubaqaan ]

marka lagaaro Aduunyo gadoonka waxaa dhici doonto in Waraabe naga dalbado in loo lebiso waatii hada kahor ladhahay Kobo ayaa laguu soo gedayaa cagocadaanta, aad socotid weey nadhibtaye waatii oow ku jawaabay hadii Kobo leeysiiyo qeeyr hadii aan waayo koleey meel uma fadhiyo kobo la aan .

Qarniyo kabacdi waxaa dhici doonto in loo lebiso Waraabaha Kobihii laga balan qaadayna loo soo iibiyo .

baari ayuu noqon doonaa Waraabaha lkn waxeey dhib ka imaan

doontaa sidii loola hishiisiin lahaa Xoolaha aan dhaqano waayo marna kama dhaadhici doonto Waraabe ayaa ogol in oow kula noolaado si nabad ah .

waxaa dhicidoonto in Xoolaha ladhaqanceliyo ilbax laga dhigo, TV ayeey daawan doonaan .

TVga waxaa laga soo deeyn doonaa Xayeesiis ku saabsan wanaaga oow leeyahay Waraabaha , Lo`da iyo Ariga waxaa labari doonaa in Waraabe laga amaan helayo .

maalmaha ugu horeeyo TVga waxaa kasoo muuqan doono Dheg waraabe ileeyn halmar lama wada tusi karo.

Xoolaha hadii eey arkaan weey ka cararayaan TVga hortiisa , si eeysan u cararin maalin walba waxaa lasoo bandhigi doonaa qeeyb yar oo kamid ah Waraabaha Jirjiisa ugu danbeeyntii waxeey arki doonaan Waraabihii oo dhameestiran .

---

waayeel waxba looma fasiro , soo celcelintaadii ereyga "iil"

Ismaaciil, israa`iil, waxeey ka dhigan tahay in aad soo wadid qaar kamid ah Bulshada asalkoodii waxeey kasoo jeedaan dhinacaas, siiba kuwii aad soo bandhigtay in eey lahaayeen Kutub aan eheeyn kii Islaamka.

Mansuur sheekada nuucaas ah waa lagaaga horeeyay wadaad Whaabi ah oo dadka qaar Sheeq ku tilmaamaan lkn culimada dhexdooda caamada ayeey ku xisaabaan , hada kahor waxoow muxaadaro kusheegay weliba CD cod ahaan kuduubay in Somalida qaar eey yihiin Yahuud .

[ jawaab uma baahna doqonka sidaas u hadlay ee Wahaabiga ah . waxaan leenahay cida aanan qaadan caqiidada Wahaabiyada ma Yahuud ayeey heestaan diintooda? Maka-rafoonka eey wahaabiyada kadhex hadashay ayaatahay

(hadalkaas Mansuur kuma socdo)]

---

**gefka ,aad ku geftay, Sh. Yusuf al kowneeyn**

sh.qa waxaad ku tilmaantay Carab , Somali nimadiisa ayaad

shaki gelisay. bal aan ku su`aalnee, Carab Afsomali bartay miyaa alifi karo ( alif wax maleh. ba hooskaale. alif lakordhabay , alif lahoos dhabay.)

waxaad sheegtay in oow sh.qa kasoo jeedo Harar.

Sheqa salaan waa ugu tegay laga yaabee lkn walaaladeena Harar degan ma isticmaalaan ( alif wax maleh) lahjadaas waxeey gaar utahay Somali siiba maay iyo maxaatiri.

hir gelinta farta Somaliga in labaro bulshada Somalida dhib adag ayaa laga soo maray, waad ogeeyd lacag adag in eey nooga baxday hirgelin teeda miyi & magaalo ayaa qarash loo huray .20 sano ayeey qaadatay in eey caan noqto qorista afka Somaliga. welina waa qabyo sida loo qoro farta Somaliga dad badan ayaan aqoonin . bal qiyaas barnaamij eey iska kaasha-nayaan wadaado ubadan Suufiyo sahay badan aanan wadan qarash kufilan aanan heeysan . Caag Biyo kushubo ee safar gal ee caruurta Somaliyeed meel walba ugu tag ee soo bar

( alif wax maleh ) in oow faafo caan noqdo waxeey qaadan kartaa 300 sano iyo kabadan waayo tignoolajiyad majirin waagaas , cida hoowsha nuucaas ah waday in aad mugdi gelisid Somali nimadiisa , qalinka aad ku qortay arinkaas waa qalin cajiib ah qaabka oow ufekeray .

---

**Mansuur Kutubkiisa waxa kuqoran bal aan Soo koobno**

(Moowduuc walba oow ka hadlo Cabdala waxaan hoos kaga qornay tacliiq .Q.R. waxeey kadhigantahay qoraaga faaladan.)

---

**Juska 1 aad waxoow kaga hadlayaa**

geediga Somalida ku soo gashay dhulka Afrika.

geedigii reer xamar.

---

**Juska 2-aad**

-Afsomaliga iyo taariiqda.

-cilmi afeedka iyo taariiqda.

- Afka Somaliga yeeyisku heeyb yihiin ?

**Juska 3-aad**

Somalida iyo xadaaradii hore

4500 sano kahor.

Asalka Xoolaha Somalida xagee kasoo jeedaan?(Aasiya )

**-------**

**Juska 4-aad**

Islaamka kahor yaadeganaa Somaliya?

-Qabuuro hore oo la helay.

-Burbur magaalooyin hore.

-yaakategay raadreebyadan.

(1)Bulshada Somalida ah magaalo weligood maba yeelan waa reer guuraa .

magaalooyinka aan kasoo hadalnay dadkale ayaa dhisay oo ilbaxnimo-fog lahaa .

---

(1). Q.R./qoraha faaladan isaga oo radinayo Odayga waxoow leeyahay. cudur ayaa ku dhacay Odayga mansuur ah kaasoo salka ku hayo udiid Somalida ilbaxnimo hore .hadalkiisa hadii aan daaha karogno waasidan ujeedadiisa "Somalida weligeed waxmanoqon dad leh ilbaxnimo hore ma ahan dhulkan eey Somalida degto maba lahan iyaga cid kale ayaa deganeeyd dalkan " . waxaan leenahay adeer dowladii fajiistaha ee aad degtay agteeda ayaa waxaas kuu meeyrisay waxaa wanaagsaneeyd in aad wax badan mashquul ku noqotid dhibkii eey noo geesteen awoowayaashii fajiistaha . )

---

**Juska 5-aad**

haraaga diimihii hore

-Diintii (waaq)

-diintii xidiga caabudka.

-saameeyntii laga dhaxlay diintii Nabi muuse.

-dhaqano u muuqdo in eey laxiriiraan diintii nabi muuse.

-goorma ayaan qaadanay diinta Yahuuda?

---

Q.R. mansuur waxoow ula jeedaa goorma ayaan qaadanay diinta Yahuuda?

Yaxar iyo Yibro goorma ayeey qaateen diinta Yahuuda?. tixraac dheer oo aan ku sameeynay meelna kuma qorin beesha oow kasoo jeedo in eey Diinkale ama mid aan Islaam eheeyn abid eey soo martay.

cida oow in badan kaga hadlayo halkan waa beelaha rayidka ah . dhanka sare ayaan kaga hadalnay qoraalkan oo dheer )

---

## Juska 6-aad

-asalka magaca Somali.

-magaalada Berbera Masaaridii hore ayaa dhistay.

-Giriiga ayaa ka kiciyay.

---

(Q.R. Odayga marka oow qorayo warsuuqeedka ubadan fadhi-kudirirka wax magaratada eey kaga sheekeestaan maqaayadaha shaaha lagacabo. waxuu doonayaa in oow kadhigo cilmi lagu kalsoonaan karo .

Somalida dhamaantood waa badaw aan weligood magaalo dhisanin.

abid waxeey ahaayeen reer guuraa.

hadalka odayga sidaas ayuu ubadan yahay. aqristoow waxaan kuu soo bandhignay Buuga qeeybahiisa hore ilaa Juska 6-aad waana kala barka Buuga bal qiyaas waxa ku qornaan karo ilaa dhamaadka Buuga . dabcan sheegid uma baahna waa Buug ka turjumayo ficiladii fajiistaha nala damac sanaa ee ku saleeysnaa in dhulka lala wareego bulshadana ladabar jaro. waa buug loogu tala galay in lagu dhaqo maskaxda bulshada intooda waxaqriska jecel ,ama ugu yaraan lagu mashquuliyo si eey kaga habsaamaan hamiga sare ee aan higsaneeyno . aqristoow aan kula dardaarmee ha iibsan hana faafin fikirka guracan ee Odayga buugiisa kusoo ban dhigay .

---

**afeef** ruuxii damco in oow noosoo qoro naqdi ku aadan waxa aan qornay , qalindaar ama sidaas ayaa fiicnaan leheeyd ruuxii jecel in oow noosoo qoro hadii aan-nahay .Q.D.Q.S. qofka jecel in oow wax naga sheego waxaan kadoo neeynaa in oow suuqa keeno moow duucyada aan qornay kuwo lamid ah.

هَذِهِ بِضَاعَتُنَا

waa in oow soo soo ban dhigaa fikradaha oow soo xulay

waana in eey ahaadaan wax u dhigmo Buuga Mansuur ee aan naqdiga ku sameeynay . ruuxii suuqa keeno 400 bog iyo kabadan waa qasab in aan wax kaqaadano dhaliisha oow soo jeediyay lkn munaafaqyar oo Masjid meel looga

furay Membarka kacaaytamo & saaxiibka maqaalka iyo Youtube ama Facebook wax yar kusoo qoro waxaan leenahay enerji badan kuuma heeyno sida aadan adigaba noogu heeynin enerji badan in aad nagu bixiso si aan wax kaaga faa iidno.

---

**Nabi Muuse waxaa lagu amray in fircoon lawaaniyo.**

anagoo raaceeyno sunadii Eebbe ee kudhisneeyd in marka hore gacma-geeljire hoos loo dhaqo.

Odayga ereyadan debecsan ayaan hoos ugu qornay.

**----------**

Mansuuroow bulshadeena 2 ayeey uqeeybsamaan

qaar kula nool ,deris iyo xigaal debka aad kala qaadatiin sida(I.&. M...) qeeybna dusha ayeey kala socdaan qaabdhaqanka qalinkaada . waxa eey kaa sugayaan in aad usoo qortid moowduuc Bulshadda quluubtooda lagu mideeyn karo kana fog quraafaadka.

magaalada Roma waxaan ku ogeeyn Gabar dhiigeeda uhurtay qadiyada

Afrika, qisadii qashinka(A.l..B.i.)

Bulshdo ahaan maxaan kugu xusuusan doonaa?.

manooga tagtay wax dhaxalgal ah ? hadii jawaabtaada haa tahay

Buugan miyaa mise kuwii aad qortay intii aad dhalinyarada eheeyd?.

_____

**Mansuur amaan ayuu naga mudan yahay!**

sh. Yusuf Alqaradaawi ayaa ka sheekeeyay qiso yaraantiisii oow la kulmay.

"markii aan yaraa ee aan soo qaan gaaray waxaa noo dhawaa Masjid.

wax hoowl ah kama socanjirin 12ka bil ee sanadka.

marka lagaaro Ramadaanka sh-qa masjidka waxuu bilaabi jiray aqrinta Kutubka safiinatu salaad

waana kutub laga barto sida salaada loo dukado loona weeysaaqaato 30 ka maalin ee ramadaanka waxoow nadhaafi jiray inaga oon dhameeynin baabka kusaabsan sida loo weeysa

qaato eeyna noo dhiman tahay qaabka loo dukan lahaa iyo soonka moowduucyadiisa.

Bulshada aan kadhalanay beryahan danbe waxeey caado kadhigteen in eey qeeyliyaan maka Buug laqoro wax yar oo qalad ah hadii eey ku arkaan waa in eey afka furtaan , bulshadeena waxeey lamid yihiin wadaadkii Masjidka iska dhex hurdi jiray ee kor aan uga soo shee keeynay bulshada Somaliyeed Buugaag badan uma qorna ruuxii wax qoro waxeey kadaba qaataan buun .

ruuxii wax qoro in la raad raaco siiba dhanka qaladaadka oo kudhuco waa dhaqan aan caado kadhiganay beryahan danbe.

---

**Dad badan oo qaatay magaca** (Prof.) lkn aanan qiimeeyn Luqada Somaliga siiba marka eey noqto in Buugaag dhaxal gal ah loo qoro Bulshada Somaliyeed weey nagu badanyihiin kuwaas .

marka eey noolyihiin wax saameen ah kuma lahan bulshadeena marka eey dhintaan cidna matebi doonto kuwaas.

**Qalinkaaga waa mid ka caafimaad qabo** qabyaalada qurunka ah ee Somalida dilootay.

waqtigaaga qaaliga ah maadaama aad u hurtay in aad bulshada afkooda wax ugu qortid . afka hooyo hormakiisa maadaama aad ka shaqeeyday amaan ayaad naga mudan tahay.

---

Mansuur waxuu qoray maqaal aad uqiimo badan

moow duuca oow kaga hadlay waa [**mideeynta afka Somaliga** ] ruuxii dhex mushaaxo mareegaha laga yaabee in oow ku arko maqaalkaas cinwaanka looga dhigay

[Mideynta-Af-Soomaaliga]

Buugaag dhaxalgal ah aanan eheeyn kan aan ka sheekeeynay ayuu leeyahay Mansuur waana sooxiganay inbadan siiba Qaamuuska Afka Somaliga eey wada qoreen Mansuur &

kooxdiisa.

---

**maxaan ula jeednaa** canaanta aan usoo jeedinay Mansuur?.

Nabi Muuse markii oow soo guryonoqday waxoow gerka ka jiiday Nabi Haaruun isaga oo dhahayo maxeey ku dhacday sidan ?.

canaanta Haaruun loo soo jeediyay manoqon mid kala dishay walaalti-nimadii kadhexeeysay Muuse iyo Haaruun .

mansuur hadii aan canaan usoo qornay macnaheeda ma ahan in aan kasaarnay mooradii Islaamka sida aan ku aragno madarasada kale ee naga soo horjeedo. jiilkii wax gaaleeysiin jiray manihin , sidaas maanka ku haay.

>>wabillaahi toowfiiq<<

---

**#Qiso: Masaay & Canfar + Hindi +Dibi.**

.Dibi ayaa kasoo fakaday wiil Canfar ah waxuu soo cararo waxeey isla soo galeen dhulka Masaayda degto

wiilkii waxuu codsaday in lala baadi goobo Dibiga

Odaygii Masaayga ahaa & Waraabe & Libaax & Nin Hindi ah & wiilkii uu kamaqnaa Dibiga dhamaantood waxeey baadi goob ugu dhaqaaqeen Dibiga .

sida loo raadinaayay weey daaleen xili duhurkii eey tahay ayeey dib isugu soo noqdeen waa ladaalan yahay baadidii maqneedna lama soo helin lkn fursad leesku wareesto ayaa la helay , Libaaxa ayaa la weeydiiyay oo adiga maxaa kugu xaqsaday in Dibiga aad baadi goobtid? Libaax ayaa ku jawaabay isagoo meeyd ah hadii lasoo helo aad cuntid ayaan ku fekeraayay haduu noolyahay aan fursad kuhelana kafaa iideeyso ayaan niyada kuhaayay.

Waraabe isna sida libaaxa ayuu kujawaabay.

Odaygii Masaayga ayaa isna hadalkii qaatay waxuu yiri aniga

kalgacal aan Lo`da uqabo ayaan uraadinayaa lkn dankale iima laabna. wiilkii uu kamaqnaa Dibiga ayaa isna yiri aniga waxaan damacsanahay in Dibiga Beerta aan kufasho. Hindiga ayaa isna hadalkii qaatay oo waxuu yiri aniga waxaanba aamin-sanahay in Dibiga uu yahay Rabiga (1) aan caabudo maqnaashahiisa weey idhibtaa sidaas ayaan idinkula raadinayaa.

Dibiga hala raadiyo qofba ujeedo gaar ah ayuu kalahaa .(qisada waa Khiyaali)

---

(1) Hindiya aad ayeey Lo`da utix geliyaan waloow aanan si hoose ula socon qaabka dhaqankooda yahay .Lo`da Hilibkeeda yaanan lacunin dhaqankaas xaguu kasoo jeedaa?.

waxeey ila tahay in dhaqankaas uu kasoo jeedo Diintii Nabi Nuux .waxaa macquul ah xiligii Doonta laga soo degay in Rabi uu mamnuucay in lacuno Hilibka waayo xoolaha aad beey uyaraayeen oo intii Nabi Nuux Doonta kuqaaday oo kaliya ayaa bad-baaday ,Nabi

Aadan ayaa Hindiya kusoo degay ayeey dheheen lkn waxaa macquul ah in uu ahaa Nabi Nuux cida kusoo degtay Hindiya. caqliga waxuu keenayaa in la mamnuuco cunista Hilibka si eey utarmaan xoolaha , dhaqanka kudhisan in aanan lacunin Hilibka weli meelaha qaar waa uu kusii danbeeyaa. Diinta Masiixiyada dadka heesto xili eeysan cunin wax walba oo ruux leh ayaa jiro, qudaarta oo kaliya ayeey kunool yihiin waana xiliga eey soomanyihiin ,Diin lanasaqay waxeey kudhex milantaa Dhaqanka Bulshada.

وَعَلَى الَّذِينَ هَادُوا حَرَّمْنَا كُلَّ ذِي ظُفُرٍ وَمِنَ الْبَقَرِ وَالْغَنَمِ حَرَّمْنَا عَلَيْهِمْ

[146 ancaam]

---

## QAABKA QABIILKA LOOGA SHEEKEEYO

farqi ayaa u dhexeeyo ka sheekeenta Qabiilka sida oow ukala baxo una wada dhasheen iyo naceeybka iyo jaceeylka kudhisan Qabiiliiste nimada.

Qoraayaasha qaar waa aan layaabaa kuwaasoo Qalinkooda kadhoowray in eey sheegaan Qabiilka lkn Qalinkooda waxaan

aragnaa iyaga oo magacyada Wiilasha eey dhaleen & Xaasaskooda Bulshada usoo bandhigayo .

xishoodka waa sheey wanaagsan lkn xishoodka waa in oowsan noqon mid aad kasoo dhoofisay Galbeedka .

Quraanka Qureeysh ayuu nooga waramay lkn markii aan si hoose usii xog wareestay waxaa iisoo baxday in Qureeshta lasheegayo tiro ahaanba eeysan gaarin Hawiye ama Daarood ama Dir & Digil.

Qureeshta ayaa nalooga waramay in badan lkn hadii aad toosh uqaadatid taariiqda oo aad la dultagtid xiligii oow noolaa Nabiga waxaa kuusoo baxayo Wadanka Eeraan & Rooma in eey ugu tun weeynaayeen Qaran ahaantii loo qeeybsanaa xiligaas .

Qureeshta oow Quraanka nooga waramayna eeyba aad uyaraayeen ,ilbax nimo lagu sheegana eeysan leheeyn dhaqaalo warkiisaba daa aqoon haba kusheegin .

inaga hadii aanahay Q.D.Q.So. ceeb uma aragno in lasoo hadal

qaado Beel kamid ah beelaha Soomaaliyeed.

Qabiilka in lasoo hadalqaado xiliga ladoonayo in Bulshada Soomaaliyeed colaad lagu dhex beero sida dhacday 1980 xiligaasoo aanan afka lagala xishoon jirin Qabiilka . xiligaan danbe Qabiilka in laga xishoodo ayaa bilaabatay waayo danahii laga lahaa waa laga gaaray oo lagu fushaday Dalkiina lagu dumiyay .

1900 Aajnabi ayaa Buugaag naga qoray waxa oow inbadan ku mashquulsanaa Qabaa`ilka sida eey ukala degan yihiin ujeedka laga lahaa waxuu ahaa in dhexdooda leesku diro sida isku aadka Kubada cagta .markeey dagaal dhexdooda ah ku halaagmaan si aayar ah in dhulka loola wareego ayuu qorshuhu ahaa.

iyagu weey tashadeen lkn tii Rabina meel beey tiilay. nin liito Eebe ayaa u maqan. Ajnabiga iyagii ayaa dhexdooda dagaal qabsaday.

inaga in badan ayaan isku mashquulinay Qabaa`ilka Somalida iyo Dhulka eey degan yihiin maxaa kadhexeeyo?

Qabaa`ilka Somaliyeed goorma ayeey magacyada ula baxeen Geedaha & dhirta & Xoolaha eey dhaqdaan & Duurjoogta.

**qolyaha naga soo horjeedo** ee Ajnabiga Qalinsidaha u ah qorshihii hore ee kudhisnaay daraaseeynta Qabaa`ilka kadibna iskudirka dhexdooda arinkaas weey bedeleen oo waxeey ogaadeen in sheekadaas eey tahay qalad, waxeey qalad kutahay Bulshada Somaliyeed waa Bulsho loo meeyrin karo in eey asalkooda yihiin reer guuraa.

Qabiil walba waa in laga dhaadhiciyaa in oow qoyan yahay raadii oow shalay kusoo degay tuulada & magaalada oow kudhex noolyahay . Culimo Diin faafin usocotay oo meesha iska degtay ayaad eheeydeen, sidaas ayaa lagu leeyahay hadii lagu arko in aatahay nin dhiifoon Qalbiga ayaa laguugu dejinayaa Diinfaafin ayaad kutimid. waxa meesha kuqarsan weli maadan

garan, waxaa ladoonayay in lagaa dhaadhiciyo socoto ayaad Dalkan Somaliya kusoo gashay.

**Afrikadaas kale** aan walaalada nahay marka lala joogo iyagana waxaa loo qeeybiyaa Af ahaan isku Af ma tihidiin dad ahaan duruuf ayaa isku kiin heeyso lkn Ajnabi meel wada degan ayaa tihiin sidaas ayaa iyana laga dhaadhiciyaa

**qolyaha Ajnabiga u adeego waxeey isku mashquuliyeen**

Somalida goorma ayeey dhulkan usoo haajirtay ?. haba soo haajiraano halkee ayeey kasoo hayaameen, Owrta eey kusoo guureen DNA halaga qaado si loo baaro asalkooda halka oow kayimid. inbadan ayeey isku mashquuliyeen arimahaas lkn hadii aan fiqhiga Kutubadiisa aan furfuro siiba Kutubka gaaban aan meel iska dhigo ee aan soo baalrogo Kutubada aadka ubaal culus waxaa iisoo baxday in Ajnabi oow qarash kusiiyo mac-hadyada isku magacaabay in eey ku mashquulsan yihiin cilmibaaris. ujeedka loo aasaasayna eey tahay in Bulshadan laga dhaadhiciyo

Dhulkaan uma aadan dhalan ee soo galooti ayaad kutahay .

inbadan ayaan maqalnay Sharuur ayuu qaatay Weriye lkn sharuurka eey qaataan Jaamacadaha & Macalimiinta ayaa kabadan , Mac-had ayaa meel kafuran sharuurna kuma shaqeeyo. garanaye Qarashka Korontada yaa kaa bixiyo?.

kuwii ugu sumcada badnaa ee Reer galbeedka kadhisnaa yaaba Sharuur kushaqeeyo wiil baahan oo Afrika kunool qoraalka uu soo daabaco in oow Heeyado arzaaqad uga raadsanaayo waa daahir yaa Shamis.

Qabiilka in eey ka hadlaan ayeey ceeb moodeen lkn Umadnimada Soomaaliyeed ayeey meel kaga dheceen .

Umad meel degan majirto hadii eey jirtana waxeey uqeebsantaa Qabiilo, in mudo ah hadii lajoogo Qabiilka waa laga gudbaa oo waxaa loo gudbaa Shacabnimo.

waxqabadka Qabiilka waxaa xilkaas la wareego Shacabka oo isku duubni ayeeyna uwada joogaan.

qadiyadooda waxeey ku qotontaa Dhulka.

ceebna maahan in Dhulka uu noqdo qadiyada, waakaase utag wiil Hargeeysa kunool oo Aabahiis kadhaxlay Guri dhoowr dabaq ah kuna dheh goorma ayaad usoo haajirtay Hargeeysa ?. iska keen lahaanshada Guriga .

Dhulkan in la difaaco lagana difaaco Qalinka Ajnabiga nala joogo waa waajib inawada saaran si qaas ah ayuuna usaaran yahay Culimada Diinta, waayo iyaga ayaanan Diinta laga iibsan karin , si loo difaaco dhulka waa qasab in laga sheekeeyo wiilashii difaaci lahaa, sida eey uwada dhasheen wanaaga aan kasoo dhaxalnay waalidkood. Qabiilkana in oowsan jiri doonin hadii aan dhulkii ladifaacin .

**sidee ayaan dhulka udifaacnaa?.**

-waxbarasho ayaan kudifaaci karnaa

-Beeraha in aan falano ayaan kudifaaci karnaa.

-Kaluunka in aan lasoo baxno ayaan kudifaaci karnaa.

-Ganacsi in aan udhaqaaqno ayaan kudifaaci karnaa.

-dhalin yarada in shaqo loo abuuro ayaan ku difaaci karnaa

-xalaal quudato in aan ahaano ayaan ku difaaci karnaa.

-jaceeyl la jeclaado HAWIYE & DAAROOD & DIR & RAXAN WEEN & JAREER oo isku duuban & Reer XAMAR, intaas oo qeerka lala jeclaado leeskuna dardaar weriyo ayaa Dalka ku difaaci karnaa.

naceeybka waa dhaxal aan kadhaxalnay Ajnabiga in badan nagumeeysanay caadadaas kudhisan Qabiil hebel necbaaw in la suuliyo , suulintaas ayaan Dalka ku difaaci karnaa.

-Magaalooyinka guud ahaan in la wada deganaado leeskuna saacido deriswanaaga sidaas ayaan Dalka ku difaaci karnaa.

-musiibo marka eey dhaco sidii Abaartii dabadheer mid lamid ah in leesku soo gurmado Qaxootiga gobol walba oow qeeybtiisa marti geliyo sidaas ayaan Dalka ku difaaci karnaa.

- hal milyan oo Buug in aad soo aqrisid ka dibna 5 Buug aad

Umada uqortid sidaas ayaad Dalka ku difaaci kartaa.

---

**Ajnabigii nagumeestay & qaabka** oow Qabiilka ula dhaqmay. Somalida waxeey dhaqan uleheed in eey Culimada ka amarqaataan kuwii hore ayaan ula jeedaaye waagii danbe markuu Ajnabiga uu nagu soo duulay Dalkeenana oow qabsaday waxoow isku deyay in oow Qabaa`ilka lasaaxiibo lkn waxaa arinkaas kadiidanaa Culimada waayo wadaadka & Gaalka marwalba weey is diidanaayeen Gaaladii weey fekereen waxeeyna soo handiseen in Qabaa`ilka madaxdooda lala wareego si taas udhacdana waa in dagaal Beelaha dhexdooda ah la abaabulaa. Beelaha qaarna la hubeeyaa si eey ugu duulaan kuwa kale marka dagaalka in mudo ah socdo Beeshii lagu duulay waxeey soo diri doontaa wefdi, danta oow leeyahay eeytahay sidee Hub ku heshaa, ileen Ajnabi ayaa Hubkii gacan kuhaayo Wadaadka marna kama suuroowdo in oow Ajnabi hoos

fariisto.

Beesha waxeey kuqasbantahay in eey soo xulato nin afmiinshaar ah oo aan Eebbe ka baqin Ajnabigana aad ujecel, aadna u neceb Beelaha Soomaaliyeed .ninkaas Ajbaniga waxuu kasoo qaataa Hub ileen waa nin aqoonta ka aradan oo aanan ogeeyn in dagaalka Beeshiisa lagu soo qaaday in oow gadaal kasoo riixayay Ajnabiga oow maanta uhoos fariistay in oow Hub kasoo helo.

Ajnabigii sidaas laba arin ayaa ugu hirgashay mid waa hogaankii Qabiilka ayuu gacan kudhigay sidoo kale waxuu booskii kariixday Wadaadkii Qabiilka maamuli jiray . Eebbe ka baqa Umada ku hogaamin jiray.Ajnabiga Beelaha markiisii horaba isaga ayaa isku diray oo Rasaas oow isaga soo dhiibay ayeey ku dagaalamayeen weeyna usahlanaatay in oow nabad ka dhex dhaliyo, sidaas ayeeyna ku noqdeen Beelo walaalo ah lkn shardiga Ajnabiga keenay beey walaalo ku yihiin, goorta oow

doono ayuuna isku diri karaa.

sidaas ayuu dhaqankoodii u bedelay una dhaqan rogay dhaqankii suubanaa ee deris kuwada noolaashaha kudhisnaa.

**Ajnabigii waatii laga guuleestay** . aniga ma aaminsani in dagaal eey Soomalida gashay in Ajnabigii lagu jebiyay lkn Ajnabigii Dalalkii eey nagaga soo duuli jireen ayaa loo gadaal maray Rooma & Faransa & UK ayaa dab ka holcay Ajnabigii sidaas ayuu nagaga tegay kuna helnay madax banaani lkn hogaankii Qabiilka weli waxbaa ka qaldanaa Odaygii Eebbe ka cabsigiisa yaraay ayaa Qabiilka horboodayay oo Wadaadkii weli meesha waa ka maqan yahay waloow aan aragno Qabiilada qaar in eey weli maamulayaan Culimo Allaah aad uga cabsato waloow aan si hoose ubaarin Culimadaas halka eey gaarsiisantahay aqoontooda Diineed, wadaad nimada beryahaan danbe waxeey noqotay waalid-keey ayaan kadhaxlay booskiisa ayaa la ii caleema saaray cilmigii oow lahaayna waxba kama

aqaano.

xiligaan aan warbixintaan idiinsoo qorayo Ajnabigii waa naga maqan yahay lkn isagoo Aqaladiisa dhex joogo ayuu halkaas fariin kasoodiraa kusaabsan Culimada halaga ilaaliyo in xil loodhiibo. (Aayatu laahi bal eeg sida loo dhibsado )

Ajnabiga waan kuraacsanahay in xil laga ilaaliyo Culimada waayo Culimada kaalintooda weeygabeen umana diyaar sana in eey xil dhabarka uritaan xiligaan lajoogo.

---

Dhaqanka xun ee Ajnabiga laga dhaxlay waxaa kamid ah in Dowlad diid lanoqdo Bulsho dhan oo wada mucaarad ah in lasoo saaro, ugu yaraan mid dhahayo maxaa iga galay Dowlad nimada. tuulada aan kunoolahay nidaamkeeda maxaa iga galay in leega dhaadhiciyo ayuu ujeedka yahay.

---

Imaam Algazaali waxuu kadigay in dadka caamada ah eey

faraha lasoo galaan CILM AL KALAAMKA.

waayo waxa laga hadlaayo ayaa ah wax eeysan fahmi karin dadka Suuqa Shaaha ku cabaayo. Wadnaha qaabka oow ushaqeeyo & qaliinka lagu sameeyo Culimo ku taqasustay ayaa jirto.

hadii aan usoo daadego ujeedka aan Qalinka usoo qaatay waxaan dhihi lahaa moowduuca kusaabsan ka hadalka Qabiilka waa moowduuc lagu dulwareejiyay qataro waana moowduuc ubaahan qibrad. Ragbadan ayaa kumaqan oo eey laqday Badweeynta Qabiilka, weliba Rag Bulshada dhexdeeda magac kulahaa , moowduucan Qabiil ka hadlida kusaabsan qofka waa in oow caadil yahay waana in oow leeyahay Eebbe ka cabsi kudhisan xiliga oow kaligiis shoowrayo.

qofka inta oowsan Qalinka usoo qaadan ka hadalka Qabiilka waa in oow usoo diyaar garoowaa, caay & aflagaado weliba jug & haraanti, jug culus & mid fudud.wax laga wiswiso & wajaan

& afxumo candhuufta oo dhankiisa loo soo tufo.

qofka waa in oow adkeeysi uleeyahay wax walba oo laga sheego , qoows ahaan & qof ahaantiisaba.waxaan ogaa wiilal badan oo baabkaan Qabiil kahadlida hoowl kadhigtay aaqirka meelxun ayeey ula dhaqaaqday , niyad ahaan ma xumeen lkn dhinaca adkeeysiga ayeey ka liiteen oo qofka Qabiilka ka hadlaayo waxaa shuruudaha kamid ah in qarniyo badan u adkeeysan karaa waxwalba oo laga sheego oowsan weligiis kategin Qalin & Qalbi cadaalad kudhisan xiliga colaada & baraaraha .

Bulshada Somalida ah ee aan hada kudhex noolnahay siiba jiilkii hore ee kusoo hoos barbaaray Ajnabiga qaab waxeey usoo barbaareen kudhisan jeclaansho Shisheeye, naceeyb looqaado Qabiilada kale. dhaqankii nuucaas kudhisnaay waxaa kasii dhaxlay jiilkan aan maanta la noolnahay.

---

**#Macna maloo helay magacyada Dumarka**

**Somali ?**

.Magacyada Dumarkii Hore & Macnahooda

Shaqlan marka gabadha loo bixiyo, waxa ay ka turjumaysaa gabadh Hililb leh (Buuran). Warla marka gabadha loo bixiyo, waxa ay ka turjumaysaa gabadh aabaheed dhintay iyada oon dhalan

Haldhaa marka gabadha loo bixiyo ,waxa ay ka turjumaysaa qurux.

Haldhaaga waxa la yidhaa Gorayada ka lab.

---

Dhudi =gabadh dheer, qurux badan oo dhuuban.

Jamaad =caanaha geela marka eey yara dhanaan noqdaan(suusac).

Xaadsan=gabadh nadiif ah

Degmo=gabadh debeecad ahaan degan.

Cambaro marka gabadha loo bixiyo, waxa ay ka turjumaysaa reer inamo badan lahaa, oo bilaa Inan ahaa. Markaa gabadhii waa qaali oo Cambar ayey noqotay.

Cutiya= gabadh Buuran

Dhool=gabadh midkeedu caddaan,yahay.

Xaali =gabadh dhaqankeedu fiican yahay

[fasiraada magacyada .Q.R.
Cali cabdi coomay/ hargeysa]

---

# Magacyada Dumarkii Hore

Abyan, Afraxo ,Amran, Aragsan, Arraweello

Barkhado, Barni, Barrey, Barwaaqo, Baxsan, Beerlula,

Caddeey, Cajabo, Canbaro, Carfoon, Cawilo, Cawo, Cawrala', Caynabo, Ceebla.

Ciiltira, Cosob, Cudbi, Cuddoon, Cugan, Culan, Cutiyo.

Dallaayad, Dallaayo, Dallays, Darmaan, Daruuro, Dawo,

Dayaxo, Daynabo, Deeqo,Deggan, Degmo,

Dhoofo, Dhool, Dhudi,

Falis, Falxado, Fanaxley, Farax, Fariido, Farxado, Farxiyo,

Fiido, Filad, Filan, Filsan, Foos.

Gaadsan, Gaarri, Gaarriyo, Gacaliso, Gacalo, Gaceedo, Gadiido,

Gallado, Gargaaro, Geeddiyo, Geelo, Geenyo, Gefla', Gobaad,

Gobey, Gordan, Guduudo, Guhaado, Gu`dhalad.

Habboon, Habsamaan, Hagarla', Haldhaa, Halgan, Haweeyo,

Heego, Hibaaq, Hibo, Hiddo, Hillaac, Hiro, Hodan, Hodman,

Hogol, Hoobaan, Hoodo, Hoombarro, Hufan.

Idil, Idman, Iftiino, Ilkaag, Ilroon, Ilwaad, Indhadeeq,

Indha`uroon, , Isir, Ismoog, Istaahil.

Jalaqsan, Jamaad, Jawaahir, Jeegaan, , Johorad, Joogdheer.

Kaabo, Kaadsoon, Kaaho, Karuuro, Kinsi, Koos, Korraad,

Kutubey.Laaco, Ladan, Luul.

Maandeeq, Maceey, Magool, Malabo, Marwo, Miido,

Murriyo.Naadiyo, Naado, Naaleeyo, Nafiso, Nagaado, Nagan,

Naruuro , Qalanjo, Qarad, Qoordheer, Qoran, Qorraxo,

Qumman.Raagsan, Raalliyo, Raaqiyo, Raaxo

Saado, Saafi, Sagal, Sahwiyo, Saluugla', Samawado,

Sareedo, Sarreeyo, Saxansaxo, Saxarla, Siman, Soohan,

Subkan, Suleekho, Sulubo, Suubban

Shankarroon, Shaqlan, Sheegan, Shoobo, Shumeey,

Tagsan, Taliso, Tanaad, Tawllan, Tigaad, Tiriig, Tisqaad,

Toolmoon, Toosan, Tooxey, Tusmo.

Ubax, Udgoon, Ugaaso, Ulasan, Umal.

Wacan, Wanaag, Warfog, Waris, Warla, Warmoog, Warsan,

Wiilo.

Xaadsan, Xaali, Xaddiyo, Xareedo, Xiddo, Xiisaan

---

[Q,R.M. C. Xasan "Alto"/2009. Filand]

---

# #Magacyada Ragii hore ee Soomaaliyeed!

Dhamac,Dhuux,Dhaqane,Digaale,Dayax,Dirir,Diiriye,

Daahir,Dafle,Dugsiiye,Dalmar,

Gaaxnuug,Geedi,Guureeye,Guure,Gaambiye,

Gaboose,Guhaad,Gudcur,Kabadhe,Kaahiye,Kulmiye,Raabi

Food,Tooxoow,Samaale,Samawade,Sigad,Suubane,

Cabbane,Cadceed,Ceelaabe,Cawed,Colaad,Cosoble,

Caydiid,Cabaade,Hirad,Hufane,Hayaan,

Xalane,Xidig,Shabeel,Good,Gaani,Toor,Qawdhan,Quule,

Raabi,Haybe,Maydhax,Maydhane,Cadaawe,Ciiltire,Sigad.

_____

Q.R.Musa Mohamoud Essa ( Dalmar )
Sweden/2009

---

.

**Hordhac Sinjiga sadaxda Beel ee Soomalida ah.**

# magacyada qabaa-ilka

Ogaadeen.

Jiido.

shaanshi.

Biyamaal.

Mudulood.

Reer Shabeele.

waxaas oo dhan waa magacyo Somaliyeed

waana loo ogolyahay in eey Somali yihiin lkn lama ogola

hadii la dhaho Kismaanyo , Zeeylac, Xamar waa magacyo Somaliyeed.

inta aanan lagu mashquulin magaalooyinka

Qabaa-ilka magacyada eey wataan macno haloo raadiyo .Afka Somaliga iyo dadka kuhadlo iyo dalka , magacyada eey wataan weey isleeyihiin cidna kooyto ma ahan ,Somalida waxeey caan

ku tahay hadii ruux u soo martiyo weey u wanqalaan magac ayeeyna u bixiyaan ee iyaga maqaataan magac kor looga keenay bal ufiirso Filimaanta Hindiya laga keenay jilaayaasha waxeey ulaa baxeen magacyo Somali oo maxali ah aanan dunida laga aqoon.

---

Somalida 3 ayaa loo qeeybiyaa

-Timo jilic.

-Timo jareer.

-gibil cad.

---

Tima jaleec ama dadka jaleec iyo jareer ayaa loo kala qaadaa.
Tima jilic= Timo jaleec= Timo qalooc. bilis.
Timo jareer= Timo jarane = Timo jarjar . Timaha iijar. Timaha ayaan soo jartay = waan soo gaabiyay Timaheeyga.

---

waxaa lees weeydiiyaa daka gibil cadka ah maxeey uga soo degi waayeen magaalada zeeylac dekadeeda?

hadii suuqa lasoo geliyay Gibil cad waa dad doon lagu keenay .

hebel adiga waxaa kasoo guurtay Afrikada fog .

adiga daaqsato ayaad eheeyd Masar dhankeeda ayaad xoolo kakeentay daaqsin ayaad halkan usoo raad satay.

hebel adiga Doon ayaad ku timid gedis leey ayaa tahay badeeco ayaad usoo iib geeysay halkan, nin walba halka oow ka yimid haloo celiyo . natiijada sheekada kasoo baxday waa dhulkan cidna maba lahan .

cida leh Dhulka Soomaaliyeed waa Gibil cad jareer , jileec dad wada jiro ayeey kuwada leeyihiin cidna doon kuma imaan ee dhulkan ayeey kudhasheen Rabi ayaana ku beeray .

caqliga waa in aan raacnaa kahor inta aanan ladhageeysanin quraafaadka Odayaasha aan waxna qorin waxna aqrin. geedka hoos tiisana aan dhaaf siisaneeyn garaad kooda.

**#run miyaa in qabiilada Somalida gebi ahaantood wadayihiin gacan kurimis**? . (iskaashato kudhisan danwadaag)

jawaab dhab ah looma hayo lkn cida hoowshaas buufiso waa layaqaanaa waa cid dano gaar ah kaleh Somalida .

Diinta Islaamka waxeey qabtaa sidan .

ادْعُوهُمْ لِآبَائِهِمْ هُوَ أَقْسَطُ عِنْدَ اللَّهِ فَإِنْ لَمْ تَعْلَمُوا آبَاءَهُمْ فَإِخْوَانُكُمْ فِي الدِّينِ وَمَوَالِيكُمْ وَلَيْسَ عَلَيْكُمْ جُنَاحٌ فِيمَا أَخْطَأْتُمْ بِهِ وَلَكِنْ مَا تَعَمَّدَتْ قُلُوبُكُمْ وَكَانَ اللَّهُ غَفُورًا رَحِيمًا (الأحزاب |5)

qabiil walba oo Somali ah wadaadka waa in oow qadariyaa dhiigooda iyo isirkooda halka eey kasoo jeedaan .

qolo walba sida eey mutafaq ku wada tahay waa in loo daayaa , fatwada Qabiilka soosaaro

marka oow ka hadlayo isirkooda hallka eey ku abtirsadaan waa in loo qiraa lana qoraa sida eey isku raaceen , qeeybaha soo socdo waxaan kusoo bandhigi doonaa BEELO SOMALI ah lkn macagyada eey wataan aan loo helin macno sax ah oo lagu fasiro waxaan isku deynay in aan soo dhaweeyno magacyada oo aan uraadino macno, anaga oo xooga saarnay sidii aan usoo xuli

leheeyn magacyada lamoodo in eey kafog yihiin af carbeedka .waan kasoo tagnay Qabiil walba oo magac carbeed watay.

---